

Mahadcelin

Waxaa mahad oo dhan iskaleh Allah ﷻ, Nabad galyo iyo Naxariis dushiisa ha ahaato Nabigeena Muxammed ﷺ. Intaas kadib waxaan halkaan mahad gaar ah ugaga diraaya walaalaheyga aan aadka u jeclahay waliba Ilaahey ﷻ dartiis, qeerkan aan faafinooyo igu caawiyay, Waxaan Alle ﷻ uga baryaa cimri dheer , caafimaad iyo cibaado suuban ayaga iyo ubadka ay dhaleen ama hada kadib ay dhali doonaan iyo dhamaan walaalahooda iyo waalidiintooda inta nool, inta dhimatayna Alle ﷻ Janadiisa Fardowsa ha geeyo Amiin.

Hooyo: Drs. Raliya Sh. Amiin Sh. Xasan Barsane,Hooyo: Drs. Rahma sh.Amiin Sh. Xasan Barsane, Hooyo: Xaawo Sh, Amiin Sh. Xasan Barsane, Hooyo: Sahro Canshuur, Adeer: Shiiq: Ilyas Iidow, Adeer: Dr. Amiin Guumow

Habaryar: Hooyo: Batula Maxamed Mursal, Hooyo: Nuurto Sh. Xaaji Rashiid, Abkow: Abdullahi Farah, Adeer. Dr. Abdulqaadir Kaabeer.

Walaal: Dr. Abdinuur Abdiraxman Foofcade, Dr. Abdirisaaq Axmed Nuur, Dr. Hashim Hassan Ahmed, Drs. Sumaya Hassan Ahmed, Drs. Firdous Nuur Abdi, Dr. Yusuf Dahir Musa, Dr. Habil Hassan Ahmed Okasha, Mudane: Akram Sh. Yuusuf, Shiiq: Abdihakiim Mohamed, Shiiqad: Aisha Ilyas Iidow, Shiiqad: Hafsa Hassan Geedi.

Macalimiinteyda: Shiiq Shariif Cabdinuur, Shiiq Yusuf Adam, Shiiq Nuur Cali Jaamac, Shiiq Maxamuud Aw Cabdulle Cariif, Shiiq Cabdulqaadir Maxamuud Abuu Rukhiya, Shiiq Maxamuud Shible, Shiiq Cabdi rashiid Shiiq Cali Suufi iyo culumo kale oo aad u badan sida:

Madaxa Majliska Idaarada Jamciyada Ta'siil Al-Cilmi, Dr Mansuur Bin Maxammed.

HORDHAC

Ilaahey ﷻ ayaa mahad iska leh, Allahii abuuray geerida iyo nolosha si uu noo imtixaano waa mid awood badan adoomahiisa u dambi dhaafo, Nabadgalyo iyo naxariis dushiisa ha ahaate Nabigeena Muxammed ﷺ.

Intaas kadib Kitaabkaan waxaan ugu magac daray:

ASBAABTA CADAABTA QABRIGA, kaaso aan ugu hadli doono falalka xun xun oo lagu muteesto cadaabta qabriga taaso maanta inbadan oo dadka kamida caadeysteen sameyntooda. Kitaabkaan waxaan ugaga hadli doona:

1. **Qofka marka uu dhimanaayo iyo xaalada sakaraadka.**
2. **Su'aalaha qabriga iyo labada malag Munkar iyo Nakiir.**
3. **Nolosha Barzaqa iyo cadaabka halkaas yaalo.**

Nolosha Barzaqa waa xaqiiqo ma ahan qayaali.

©Copyright:
Xuquuqda Kitaabka waxay u xafidan tahay
Qoraaga iyo turjumaanka Kitaabka.
Hadi Hassan Ahmed.
Göteborg, Sweden 2022

Kala soo xariir:
Email: aqoonta114@gmail.com
Kheyracademy@gmail.com
Tel:(mobile) +46762313940

9 789152 711033

Tusmada Kitaabka
Mahadcelin.....3
Hordhac.....5
Cutubka 1aad.....15
Cutubka 2aad.....34
Cutubka 3aad.....41

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿حَتَّىٰ إِذَا جَاءَ أَحَدَهُمُ الْمَوْتُ قَالَ رَبِّ ارْجِعُونِ ﴿٩٩﴾ لَعَلِّي أَعْمَلُ صَالِحًا فِيمَا تَرَكْتُ ۚ كَلَّا ۚ إِنَّهَا كَلِمَةٌ هُوَ قَائِلُهَا ۖ وَمِن وَرَائِهِم بَرْزَخٌ إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ﴿١٠٠﴾﴾

(Al-Muminun – 99-100)

Markuu u Yimaaddo Midkood (Gaalada) Mawdku wuxuu Dhihi Eebow I celiya.Waxaan u Dhawahay inaan Falo Wanaage waxaan ka Tagay, saas ma aha ee waa Hadal uu iska Yidhi Gadaashoodana waxaa ah Barzakh, tan iyo Maalinta la Soo Bixin.

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ: إِذَا وُضِعَ -يَعْنِي: الْكَافِرَ- فِي قَبْرِهِ، فَيَرَى مَقْعَدَهُ مِنَ النَّارِ. قَالَ: فَيَقُولُ: رَبِّ، ارْجِعُونِ أَتُوبُ وَأَعْمَلُ صَالِحًا. قَالَ: فَيُقَالُ: قَدْ عُمِّرت مَا كُنْتَ مُعَمَّرا. قَالَ: فَيُضَيَّقُ عَلَيْهِ قَبْرُهُ.

Abii Hureyra wuxuu yiri: haddii Gaalka qabrigiisa la dhigo, wuxuu arkaa booskii uu Naarta ku lahaa, wuxuuna leeyahay Rabiyoow i celi aan towbad keeno camal wanaagsan aan sameeyo, waxaa lagu leeyahay: cimri ayaan ku siinay aad ku towbad keentid, kadibna qabriga ayaa cariiri ku noqonaayo.

عَنْ عَائِشَةَ، أَنَّهَا قَالَتْ: وَيْلٌ لِأَهْلِ الْمَعَاصِي مِنْ أَهْلِ الْقُبُورِ!! تَدْخُلُ(٤) عَلَيْهِمْ فِي قُبُورِهِمْ حَيَّاتٌ سُودٌ -أَوْ: دُهْمٌ- حَيَّةٌ عِنْدَ رَأْسِهِ، وَحَيَّةٌ عِنْدَ رِجْلَيْهِ، يَقْرُصَانِهِ حَتَّى يَلْتَقِيَا(٥) فِي وَسَطِهِ، فَذَلِكَ الْعَذَابُ فِي الْبَرْزَخِ الَّذِي قَالَ اللَّهُ تَعَالَى: ﴿وَمِنْ وَرَائِهِمْ بَرْزَخٌ إِلَى يَوْمِ يُبْعَثُونَ﴿١٠٠﴾﴾

Caa'isha RC waxay tiri: halaag ayaa u sugnaaday ahlu macaasida kamida kuwa ahlu qubuurta ah, maalin walbo waxaa qubuurahooda

usoo galaayaan abeesooyin madmadoow, hal abeeso dhinaca madaxiisa ayay uga soo galeysaa, mida kalena lugaha agtooda, ilaa ay kaga kulmaan dhaxda macnaha midana cunitaanka madaxa ayay kasoo bilaaweysaa tan kalena lugaha kadibna dhanka caloosha ayay iskugu imaanayaan ayaga midba ay dhinac kasoo cuneyso, kaasina waa cadaabka qabriga sida ku cad Ayada 100aad ee surah Muminun.

****

Asbaabaha cadaabta qabriga lagu muteesto way badan yihiin waxaana kamid ah:

- Gaalnimada.
- Munaafaqnimada.
- Kaadida oo leyska dhaqi waayo najaasteeda.
- In uu qofka is asturi waayo marka uu xaajada gudanaayo.
- Namiimnimada: dadka in leysku diro.
- Xanta.
- Cunista xaaranta xoolaha Muslimiinta oo la dhaco.

- Tuuganinada.
- Ribada.
- Zinada.
- Qaniisnimada.
- Beenta badan.
- Salaada faradka oo laga hurdo ama laga tago si kas ah.
- Qur'anka oo laga tago aqrintiisa laguna camal faliwaayo.
- Dadka in wanaaga la faro, qofka wanaaga faraayana uu nafsadiisa ilaawo.
- Diinta Alle ﷻ oo laga jeesto.
- Marada oo qoobabka dhaafto.
- Maalin ayadoo ay Ramadaan tahay in si kas ah loo afuro ama macaasi kale la sameeyo.

- Haweeneyda oo canugeeda nuujin u diido ayadoon dhib jirin.
- Xeywaan in la xabiso oo la cadaabo ilaa uu ka dhinto.
- Markii uu qof dhinto in loo ooyo.
- Zakada oo la bixin waayo.

****

■ GAALNIMADA

Gaalnimada afar qeybood ayay u kala baxda:

1. Gaalnimada qarsoon: waa munaafaqnimada oo ah in muslimnimo la muujisto hasa ahaate dadka muslimiinta ah iyo diinta Islamka hoos laga naco ama la kiraahsado, waana gaalnimada ugu daran oo ay ku sifoobeen Munaafiqiintii uu madaxda u ahaa Cabdullahi Ubey bin Saluul Lacanahulaah.
2. Gaalnimada muuqato: waa tan la cadeysto oo muuqato, waana gaalnimada ay ku sifoobeen, Namruud, Fircoon, Haamaan, Qaaruun, Abu Lahab, Abu Jahal lacanahumullah, iyo kuwa lamidka ah.
3. Gaalnimada Atheist: Gaalnimadaan waa mida cawaanimada ah taaso ah in la diido in Alle ﷻ uu jiro, taas badalkeedana la aamino

wax walbo in ay dabeecad ku yimaadeen, Gaalnimadaan waxay kasii darantahay mida la muujisto hasa ahaate la aamino in Alle ﷻ uu jiro.

4. Gaalnimada iimaanka kadib ama Murtadka: Gaalnimadaan waa mida lala yimaado markii Alle ﷻ iyo Rasuulkiisa ﷺ la aaminay kadib taaso ah in laga ridoobo ama laga baxo diinta Islamka ama salaada si kas ah loogaga tago.

Maanta waad caafimaad qabta waad dukan kartaa, lakiin markii aad dhimatid walahi aamin ama ha aaminin nolol waaqici oo saan ka duwan ayaad galeysaa ama waa cadaab ama waa raaxo.

Nabiga ﷺ habeenkii la dheelminaaye waxaa lasoo tusay dad la cadaabayo waliba cadaab kala duwan cadaabka taaruk salaadka waxaa lagu sheegay xadiithkaan.

إنَّ المؤمنَ في قبرِه لفي روضةٍ خَضراءَ، فيُرحَّبُ لهُ في قبرِه سبعينَ ذراعًا، ويُنوَّرُ لهُ كالقمرِ ليلةَ البدرِ أتَدرونَ فيم أُنزلتْ هذهِ الآيةَ ﴿فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنْكًا وَنَحْشُرُهُ يَوْمَ الْقِيامَةِ أَعْمى﴿١٢٤﴾﴾ قال: أتَدرونَ ما المعيشةُ الضَّنكُ؟ قالوا: اللهُ ورسولُه أعلمُ قال: عَذابُ الكافرِ في قبرِه، والَّذي نفسي بيدِه إنَّه يُسلَّطُ عليهِ تِسعةٌ وتِسعونَ تِنّينًا، أتدرونَ ماالتِنّينُ؟ تِسعونَ حيةً لكلِّ حيَّةٍ سبعُ رؤوسٍ يلسَعونَه ويخدِشونَه إلى يومِ القيامةِ.

الألباني ، صحيح الترغيب ٣٥٥٢

حسن.

Mu'minka qabrigiisa wuxuu u noqonaaya beer kamida beeraha Jannada, waana loo waasicina qabrigiisa ilaa 70tan dhudhun, waana loo nuurina

sida bisha habeenkii markii ay tahay leylatul badarka, kadib wuxuu yiri: ma taqaanan aayadaan yay kuso dagatay?

Allah ﷻ wuxuu yiri: waxaa u sugnaaday nolol cariiri ah waana laso kulmina maalinka qimaaye asagoo indho la', (Ta-Ha Ayah 124) wuxuu yiri: ma taqaanan nolosha cariiriga ah? Waxay yiraahdeen Alle ﷻ iyo Rasuulkiisa ﷺ ayaa og, wuxuu yiri: waa cadaab gaalka lagu cadaabayo qabrigiisa, Allaha nafsadeeda ay gacantiisa ku jirta ku dhaartaye waxaa lagu salida 99 tiniino , mataqaanan tiniinka? Waa 90 abeesooyin halkii abeeso ay leedahay 7 madax kuwaaso cuni doonan qofka gaalka ah ilaa maalinta qiyaame.

Albaani ayaa ku saxiixyay Saxiixu Targiibka, 3552.

Xadiithka waa xasan.

****

Xadiithkaan waxaan ka faa'ideysaneena:

1. Nolosha barzaqa iney ka duwantahay kana cabsi badan tahay noloshaan aan hada ku noolnahay.

2. Nolosha barzaqa raaxo ma taalo cuno iyo cabitaan iyo jiif toona, lakiin waxaa lagugu salida 99 tiniino abeesooyin ah halkii tiniina ay ka kooban tahay 90 abeeso, 1kii abeesana 7 madax ayay leedahay.

3. Qofka salaada dukan waayo waa gaal guud ahaan culumada way isku raaceen.

****

Nabiga ﷺ wuxuu yiri:

العَهْدُ الَّذي بينَنا وبينَهُمُ الصَّلاةُ، فمَن تَرَكَها فقد كفَرَ

إسناده على شرط مسلم

أخرجه الترمذي (٢٦٢١)،

والنسائي (٤٦٣)،

وابن ماجه (١٠٧٩)،

وأحمد (٢٢٩٨٧).

Farqiga noo dhaxeeya ANAGA iyo MUNAAFIQIINTA waa salaada qofkii ka tago dukashadeeda waa GAAL.

Xadiithka isnaadkiisa waa sidaan sida ku sugan shardiga Muslim.

Waxaa kaloo soo saaray At-Tirmidi 2621, An-Nisa'i 463, Ibnu Maajah 1079, Axmed 22987.

Xadiithkaan waxaan ka faa'ideysaneena:

MUNAAFAQA iyo MUSLIMKA salaada lagu kala saara. MUSLIMKA waa kan salaada ooga Alle ﷻ ka baqo iyo Cadaabka qabriga, MUNAAFAQA iyo GAALKA marwalbo waa isku koox cadaabka qabrigana isku si ayaa loo cadaabaya.

- **MUNAAFAQNIMADA**

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿إِنَّ الْمُنَافِقِينَ يُخَادِعُونَ اللَّهَ وَهُوَ خَادِعُهُمْ وَإِذَا قَامُوا إِلَى الصَّلَاةِ قَامُوا كُسَالَىٰ يُرَاءُونَ النَّاسَ وَلَا يَذْكُرُونَ اللَّهَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٤٢﴾﴾

(An-Nisaa - 142)

Munaafiqiintu waxay dhagri Eebe (isku dayi) isna wuu dhagri (oo abaal Marin) markay u istaagaan Salaaddana way istaagaan iyagoo wahsan, oo is tusi Dadka Mana xusaan Eebe wax yar mooyee.

Nabiga ﷺ wuxuu yiri:

أثقلُ الصلاةِ على المنافقين صلاةُ العشاءِ وصلاةُ الفجرِ

أخرجه البخاري (٦٥٧)،

ومسلم (٦٥١)

صحيح

Salaada ku culus munaafiqiinta waa salaadaha cishaha iyo fajarka salaada subax.

Waxaa soo saaray Al-Bukhaari 657.

Muslim 651.

Saxiix.

****

1. **Cutubka 1aad**: Qofka marka uu dhimanaayo iyo xaalada sakaraadka.

Qofka marka uu risqigiisa u dhamaado cimrigiisa waxba looguma daraayo waxbana lagama dib dhigaayo, ee saacadii loo qoray waxaa u imaanayo Malakul Mowd oo ah Malaga loo xil saaray in uu noole oo dhan nafta ka qaado, Allah ﷻ ayaana u wakiishay.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿ قُلْ يَتَوَفَّاكُم مَّلَكُ الْمَوْتِ الَّذِي وُكِّلَ بِكُمْ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمْ تُرْجَعُونَ ﴿١١﴾ ﴾

(As-Sajda - 11)

Waxaad dhahdaa waxaa idin oofsan (dili) Malaga mowdka laydiin wakiishay markaasaa xagga Eebihiin laydiin celin.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿ وَلَوْ تَرَىٰ إِذِ الظَّالِمُونَ فِي غَمَرَاتِ الْمَوْتِ وَالْمَلَائِكَةُ بَاسِطُو أَيْدِيهِمْ أَخْرِجُوا أَنفُسَكُمُ ۖ الْيَوْمَ تُجْزَوْنَ عَذَابَ الْهُونِ بِمَا كُنتُمْ تَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ غَيْرَ الْحَقِّ وَكُنتُمْ عَنْ آيَاتِهِ تَسْتَكْبِرُونَ ﴿٩٣﴾ ﴾

(Al-An'am - 93)

Haddaad Aragto markay Daalmiintu Sakaraadka Geerida ku Suganyihiin Malaa'igtuna ku dhihi Iyagoo uso Taagi Gacmaha Bixiya Naftiina Maanta waxaa laydinku Abaal marina Cadaab Dulli ah waxaad

ku Dhahayseen Eebe Xaqdarro ood Ahaydeen kuwu Iska Wayneeya Aayadkiisa (Waxaad arki lahayd wax Wayn).

Sidaan ayuu xaalka gaalka noqonaaya markii ay Malaa'igta Alle ﷻ u timaado misna nafsada si dulli ah loogaga qaadayo.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿وَجَاءَتْ سَكْرَةُ الْمَوْتِ بِالْحَقِّ ۖ ذَٰلِكَ مَا كُنتَ مِنْهُ تَحِيدُ ﴿١٩﴾﴾

(Qaf – 19)
Waxaa u yimid sakaraadkii geerida si dhab ah wanataas geeridaad ka cararaysay.

Waa maxay dhimasho?

■ Dhimasho waxaa la yiraahda: Markii ruuxda iyo Jasadka ay ku dhaxjirtay ay kala baxaan isla markaasna ruuxda xaga sare loo qaado.

Waa maxay Ruux?

■ Allah ﷻ sida uu sheegay: Ruuxda waa amarka xaga Rabi Ka timaado mana lihin cilmi wax yar mooye.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿وَيَسْأَلُونَكَ عَنِ الرُّوحِ ۖ قُلِ الرُّوحُ مِنْ أَمْرِ رَبِّي وَمَا أُوتِيتُم مِّنَ الْعِلْمِ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٨٥﴾﴾

(Al-Israa - 85)

Waxay ku warsan Ruuxda, dheh ruuxdu waa Amarka Eebahay Cilmina wax yarbaa la idin siiyay.

Cid walba way dhiman kaliya waxaa haraayo wajiga Alle ﷻ, Nabiga ﷺ ayaa waxaa lagu yiri:

﴿إِنَّكَ مَيِّتٌ وَإِنَّهُم مَّيِّتُونَ ﴿٣٠﴾﴾

(Az-Zumar – 30)

Adigu waad dhiman iyaguna (Gaaladu) way dhiman.

Marba haddii Rasuulkii Alle ﷺ la yiri: waad dhimaneysaa, sidoo kale aayada waxay tilmaamtay inaan anagana dhimaneeno oo khalqiga Alle ﷻ abuuray wax haraayo aysan jirin.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿كُلُّ مَنْ عَلَيْهَا فَانٍ ﴿٢٦﴾﴾

(Ar-Rahman - 26)

Dhammaan waxa (Dhulka) korkiisa ah wuu tagi

﴿وَيَبْقَىٰ وَجْهُ رَبِّكَ ذُو الْجَلَالِ وَالْإِكْرَامِ ﴿٢٧﴾﴾

(Ar-Rahman – 27)

Waxaase hadhi Eebaha wayn ee sharafta leh.

Haddaba qasiidadii waxay ahayd:

أيا عبد كم يراك الله عاصياً حريصاً على الدنيا وللموت ناسيا نسيت لقاء الله واللحد والثرى ويوماً عبوساً تشيب فيه النواصيا إذا المرء لم يلبس ثياباً من التقى تجرد عرياناً ولو كان كاسيا ولو كانت الدنيا تدوم لأهلها لكان رسول الله حيَّاً وباقياً ولكنها تفنى ويفنى نعيمها وتبقى الذنوب والمعاصي كما هيا

Adoonkaanoow immisa ayuu Allah ﷻ ku arkaaya adigoo caasinaayo,

Aduunyada ku dadaalaayo suu u heli lahaa geeridana ilawday,

Ma waxaad ilaawday lakulankii Alle ﷻ iyo godkii madoobaa iyo ciidi,

Iyo maalin cariiri badan caruurtana cireysan doonan,

Haddii uusan qofka ku labisanin labiska taqwada,

Wuxuu ahaada mid qaawan haba asturnaado jir ahaan,

Haddiise aduunyadaan ehelkeeda waaraayan,

Rasuulkii Alle ﷺ ayaa noolaan lahaa oo baaqi ahaan lahaa,

Lakiin way dhamaaneysaa nimcooyinkeedana way baaba'aayan,

Macaasida iyo dunuubtana sidooda ayay ahaanaayan.

Allaha ﷻ wuxuu yiri:

﴿كَلَّا إِذَا بَلَغَتِ التَّرَاقِيَ ﴿٢٦﴾﴾

(Al-Qiyamat - 26)

Saas ma aha ee markay naftu gaadho Dhuunta (Waqtiga Geerida

﴿وَقِيلَ مَنْ ۜ رَاقٍ ﴿٢٧﴾﴾

(Al-Qiyamat - 27)

Oo la Dhoho uaa ku tufi

﴿وَظَنَّ أَنَّهُ الْفِرَاقُ ﴿٢٨﴾﴾

(Al-Qiyamat - 28)

Oo uu Yaqiinsado inuu Dhiman

﴿وَالْتَفَّتِ السَّاقُ بِالسَّاقِ ﴿٢٩﴾﴾

(Al-Qiyamat - 29)

Oo labada Dhudhun isku marmaan (sakaraad Dartiis

﴿إِلَىٰ رَبِّكَ يَوْمَئِذٍ الْمَسَاقُ ﴿٣٠﴾﴾

(Al-Qiyamat - 30)

Eebahaa Xaggiisaa la aadi

﴿فَلَا صَدَّقَ وَلَا صَلَّىٰ ﴿٣١﴾﴾

(Al-Qiyamat - 31)

Mase Rumaynin Gaalku Xaqa mana tukannin

﴿وَلَٰكِن كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ﴿٣٢﴾﴾

(Al-Qiyamat – 32)

Laakiin wuu Beeniyay wuuna Jeedsaday.

Ayadahaan waxay ka hadlaayaan adoon geerida si kadis ah ay ugu timid asagoo Alle ﷻ caasin jiray gaal ahaa oo aanan salaadaha dukan jirin Alle ﷻ muusan rumeysneen, kadibna nafsadii waxay u timid dhuunta, dadkii ayaa dooneen iney badbaadiyaan, lakiin waa ay u awoodi waayeen, wuxuuna ogaaday inuu dunidaan kasii socdo, intii uu noola salaadaha shanta ah ma uusan dukan jirin, maalkii faraha badnaa ee uu Alle ﷻ ugu deeqayna ma uusan sadaqeysan jirin, lakiin Alle ﷻ ayuu beenyay xaqiina waa uu ka jeestay.

Haddaba qofka mu'minka ah markuu dhimanaayo waa see xaalkiisu?

Allaha ﷻ wuxuu yiri:

﴿فَأَمَّا إِن كَانَ مِنَ الْمُقَرَّبِينَ ﴿٨٨﴾﴾

(Al-Waqi'a - 88)
Hadduu ka mid yahay (Ruuxa dhiman) kuwa Eebe u dhawaay

﴿فَرَوْحٌ وَرَيْحَانٌ وَجَنَّتُ نَعِيمٍ ﴿٨٩﴾﴾

(Al-Waqi'a - 89)
Wuxuu heli naxariis iyo farax iyo Jannada Naciima

﴿وَأَمَّا إِن كَانَ مِنْ أَصْحَابِ الْيَمِينِ ﴿٩٠﴾﴾

(Al-Waqi'a - 90)
Hadduu yahay kuwa Midigta marina

﴿فَسَلَامٌ لَّكَ مِنْ أَصْحَابِ الْيَمِينِ ﴿٩١﴾﴾

(Al-Waqi'a – 91)

Nabadgalyaa u sugnaatay (iyo wanaag).

عن بريدة بن الحصيب الأسلمي قال: قال رسول الله ﷺ المؤمنُ يموتُ بعَرَقِ الجَبينِ

أخرجه الترمذي (٩٨٢)،
والنسائي (١٨٢٩)،
وابن ماجه (١٤٥٢)،
وأحمد (٢٣٠٩٧)
حسن

Bureyda Bin Al-Xisiib Al-Aslami wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: Mu'minka waxaa calaamad u ah markuu dhimanaayo dhafoorkiisa waxaa ka yimaado dhidid. Waxaa soo saaray At-Tirmidi 982, Nisaa'i 1829, Ibnu Maajah 1452, Axmed 23097. Xadiithkan waa xasan.

Dhididkaas wuxuu yimaada markuu sakaraadka ku adkaado, sidaas darteed waa calaamada lagu yaqaano mu'minka.

Sidoo kale mu'minka markuu dhimanaayo camal wanaagsan ayaa loogu qatimaa noloshiisa.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

إذا أرادَ اللَّهُ بعبدٍ خيرًا استَعملَهُ، قالوا: يا رسولَ اللَّهِ وَكَيفَ يستَعمِلُهُ؟ قالَ: يوفِّقُهُ لعملٍ صالحٍ قبلَ موتِهِ

إسناده صحيح على شرط الشيخين

أخرجه الترمذي (٢١٤٢)،

وابن حبان (٣٤١)

Haddii uu Alle ﷻ adoonkiisa la doono qeyr wuu howl galiyaa, saxaabadii waxay yiraahdeen: sidee buu u howl galinaa Rasuulkii Allow ﷺ? Wuxuu Alle ﷻ adoonkiisa waafajina camal wanaagsan kadibna sidaas ayuu ruuxda kaga qaada. Xadiithkaan Isnaadkiisa waa saxiix markii loo eego shardiga labada shiiq Bukhaari iyo Muslim, waxaa kaloo soo saaray At-Tirmidi 2142, Ibnu Xibaan 341.

Nabiga ﷺ markii ay nafta kasii baxeysay wuxuu dhahaayay:

لا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، إِنَّ لِلْمَوْتِ سَكَرَاتٍ.

صحيح البخاري ٤٤٤٩.

صحيح

Allah ﷻ mooye Ilaah kale ma jiro oo xaq lagu caabudo, mowdka waa sakaraad, kadibna wuu geeriyooday. Saxiix Al-Bukhaari 4449.

Saxiix.

Wuxuu ku dhintay Madina, 11 jirada, oo ku aadaneyd 632 Milaadiyada, 12 Rabicul Awwal.

Haddaba qof walbo wuxuu ku dhiman doona xaaladii uu markaasi faraha kula jiray, tusaale ahaan:

Ruuxa asagoo zino ku jiro dhimanaayo, Ruuxa asagoo salaad ku jiro dhimanaayo, Ruux ayaa dhimanaayo asagoo ganacsi ku mashquulsan, Ruux ayaa dhimanaayo asagoo xoolo umad dhacaayo, Ruux ayaa dhimanaayo asagoo xaqiisa u diriraayo, Ruux ayaa dhimanaayo asagoo faraxsan, Ruux kale ayaa dhimanaayo asagoo murugsan, Ruux kale ayaa dhimanaayo asagoo caafimaad qabo, Ruux kale ayaa dhimanaayo asagoo jiran. Dhimashada ama Geerida balan la yaqaano malahan waxaase wanaagsan in loo diyaar garoobo oo loo shaqeysto.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿أَلْهَاكُمُ التَّكَاثُرُ ۝١﴾

(At-Takathur - 1)

Waxaa idin shuqliyay Dadow wax badsasho (iyo isu faanid),

﴿حَتَّىٰ زُرْتُمُ الْمَقَابِرَ ۝٢﴾

(At-Takathur - 2)

Intaad Xabaalaha ka tagtaan (dhimataan).

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

يقولُ العبدُ: مالي مالي، وإنَّ من مالِهِ ثلاثًا: ما أكل فأفْنى، أو لبِسَ فأبْلى، أو أعْطى فأقْتنى، وما سِوى ذلِكَ، فهو ذاهِبٌ وتارِكُهُ للناسِ

صحيح الجامع ٨١٣٣
أخرجه مسلم ٢٩٥٩
صحيح

Adoonka wuxuu leeyahay maalkeyga maalkeyga, maalkana waa u sadax: wixii uu cunay oo uu saxarooday, ama wixii uu ku labistay oo cowradiisa qariyay, ama uu sadaqeestay oo Alle ﷻ agtiisa u jiro, wixii intaas kasoo haro kii lahaa wuu ka tagaa dadka ayaana qaadanaayan. Saxiix Al-Jaamic 8133, waxaa kaloo soo saaray Muslim 2959. Waa saxiix.

Nabiga ﷺ wuxuu yiri:

الكَيِّسُ مَن دان نفسَه وعمِل لما بعدَ المَوتِ.

أخرجه الترمذي ٢٤٥٩ ، وابن ماجة ٤٢٦٠ ، وأحمد ١٧١٦٤

حسن

Dhug badane waa kan xisaabiyo naftiisa una camal fasho geeri dabadeed".

Waxaa soo saaray At- Tirmidi 2459, Ibnu Maajah 4260, Axmed 17164.

Waa xasan.

قال عمر رضي الله عنه حاسبوا أنفسكم قبل أن تحاسبوا وزنوا أنفسكم قبل أن توزنوا وتأهبوا للعرض الأكبر يومئذ تعرضون لا تخفى منكم خافية".

Cumar Bin Al-Khataab Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: xisaabiya nafsadiina inta aan la xisaabin kahor, xabisa nafsadiina(xumaanta ka

xabisa ka celiya) intaan la xabisin kahor(intaan god lagu aasin kahor), waxaa dushiina ku fudud xisaabta berito marka la eego inaad maanta nafsadiina xisaabisaan(maanta idin fudud inaad xisaabisaan naftiina maalinta qiyaame waa abaal marin), isu qurxiya bandhig weyn(waa maalinta qiyaame), Maalintaasaa dadka loo soo bandhigi Eebe wax xagooda kaga qarsoonna ma jiro.

****

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿وَجَاءَتْ سَكْرَةُ الْمَوْتِ بِالْحَقِّ ۖ ذَٰلِكَ مَا كُنتَ مِنْهُ تَحِيدُ ﴿١٩﴾﴾

(Qaf – 19)

Waxaa u yimid sakaraadkii geerida si dhab ah wanataas geeridaad ka cararaysay.

﴿۞ قُلْ يَتَوَفَّاكُم مَّلَكُ الْمَوْتِ الَّذِي وُكِّلَ بِكُمْ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمْ تُرْجَعُونَ ﴿١١﴾﴾

(As-Sajda - 11)

Waxaad dhahdaa waxaa idin oofsan (dili) Malaga mowdka laydiin wakiishay markaasaa xagga Eebihiin laydiin celin.

عن البراء بن عازب: قال رسول الله صلي الله عليه وسلم : إنَّ العبدَ المؤْمن إذا كان في انْقِطَاعٍ من الدُّنْيَا، وإقْبالٍ من الْآخِرَةِ، نزل إليه من السَّمَاءِ ملائكةٌ بِيضُ الوجُوهِ، كأَنَّ وجوهَهُمُ الشمسُ ، معهُمْ كفنٌ من أَكْفَانِ الجنَّةِ، وحَنُوطٌ من حَنُوطِ الجَنَّةِ ، حتى يَجْلِسُوا منه مَدَّ البَصَرِ ، ثُمَّ يَجِيءُ مَلَكُ المَوْتِ حتى يَجلِسَ عندَ رأسِه فيَقولُ : أيَّتُهَا النَّفْسُ الطَّيِّبَةُ اخْرُجِي إلى مغْفِرةٍ من اللَّهِ ورِضْوَانٍ، فتخْرُجُ تَسِيلُ كما تسِيلُ القَطْرَةُ من فِي السِّقَاءِ ، فيَأْخذُها ، فإذا أخَذَها ، لم يَدَعُوها في يَدِه طَرْفَةَ عَيْنٍ، حتى يَأْخُذُوها فيَجْعَلُوهَا في ذلكَ الكَفَنِ وفي ذلكَ الحَنُوطِ ، فيَخْرُجُ منها كأَطيَبِ نَفْخَةِ مِسْكٍ، وُجِدَتْ على وجْهِ الأرضِ، فيَصْعَدُونَ بِها فلا يمُرُّونَ بها على مَلَكٍ من الملائِكَةِ، إلَّا قالُوا: ما هذا الرُّوحُ الطَّيِّبُ؟ فيقولُونَ : فُلَانُ بنُ فُلَانٍ بأَحْسَنِ أسمائِه التي كانُوا يُسَمُّونَه بها في الدُّنْيَا – حتى ينْتَهُوا بها إلى السَّمَاءِ الدُّنْيَا فَيَسْتَفْتِحون له فَيُفْتَحُ له ، فيُشَيِّعُهُ من كلِّ سماءٍ مُقَرَّبُوها إلى السماءِ التِي تليها ، حتى يُنتَهَي إلى السماءِ السابِعةِ ، فيقولُ اللهُ عزَّ وجلَّ : اكْتُبُوا كِتابَ عبدِي في عِلِّيِّينَ ، وأَعِيدُوا عَبدِي إلى الأرضِ ، فإنِّي مِنها خَلَقتُهم ، وفِيها أُعِيدُهُم ، ومِنها أُخْرِجُهم تارةً أُخْرَى . فتُعادُ رُوحُه ، فيَأتِيهِ مَلَكانِ ، فيُجْلِسانِه ، فيَقولانِ له : مَن ربُّكَ ؟ فيقولُ : رَبِّيَ اللهُ ، فيَقولانِ له : ما دِينُكَ ؟ فيَقولُ : دِينِيَ الإسلامُ ، فيَقولانِ له : ما هذا الرجلُ الذِي بُعِثَ فِيكُمْ ؟ فيَقولُ : هو رسولُ اللهِ ، فيَقولانِ له ومَا عِلْمُكَ ؟ فيَقولُ : قَرأتُ كِتابَ اللهِ فآمَنتُ به وصَدَّقْتُ ، فيُنادِي مُنادٍ من السماءِ أنْ صَدَقَ عَبدِي ، فَأَفْرِشُوه من الجنةِ ، وأَلْبِسُوهُ من الجنةِ ، وافْتَحُوا له بابًا إلى الجنةِ ، فيَأتِيهِ من رَوْحِها وطِيبِها ، ويُفسحُ له في قَبرِهِ مَدَّ بَصرِهِ ، ويَأتِيهِ رَجلٌ حَسَنُ الوَجهِ ، حَسنُ الثِّيابِ ، طَيِّبُ الرِّيحِ ، فيَقولُ : أبْشِرْ بِالَّذِي يَسُرُّكَ ، هذا يَومُكَ الذي كُنتَ تُوعَدُ ، فيقولُ لهُ : مَن أنتَ ؟ فوجْهُكَ الوَجْهُ يَجِيءُ بِالخيرِ ، فيَقولُ : أنَا عَملُك الصالِحُ ، فيَقولُ : رَبِّ أقِمِ السَّاعَةَ ، رَبِّ أقِمِ الساعَةَ ، وإنَّ العبدَ الكافِرَ إذا كان في انقِطَاعٍ من الدنيا، وإقبالٍ من الآخِرةِ ، نزل إليه من السماءِ ملائكةٌ سُودُ الوجُوهِ معَهُمُ المُسُوحُ ، فيجلِسُونَ منه مَدَّ البَصَرِ ، ثُمَّ يَجِيءُ مَلَكُ الموتِ حتى يَجْلِسَ عِنْدَ رَأْسِهِ فَيَقُولُ: يَا أيَّتُهَا النَّفْسُ الْخَبِيثَةُ اخْرُجِي إلى سَخَطٍ من اللَّهِ وغَضَبٍ ، فَتَفْرُقُ في جَسَدِهِ فيَنتَزِعُهَا كَما يُنتَزَعُ السَّفُّودُ من الصُّوفِ المَبْلُولِ ، فيَأْخذَها ، فإذا أخذَها لَم يَدعُوها في يَدِهِ طَرْفَةَ عَينٍ حتى يَجْعَلُوهَا في تِلْكَ الْمُسُوحِ ، يخرجُ منها كأَنْتَنِ ريحٍ جِيفَةٍ، وُجِدَتْ على ظَهْرِ الأَرضِ فيصْعَدُونَ بِها، فلا يَمُرُّونَ بها على مَلَكٍ من الملائِكَةِ إلَّا قَالُوا: ما هذا الرُّوحُ الْخَبِيثُ؟

فيَقُولُونَ: فُلَانُ بنُ فُلَانٍ بأَقْبَحِ أَسْمَائِهِ التي كان يُسَمَّى بِهَا في الدُّنْيَا، حتى يَنْتَهِيَ بِهَا إلى سَمَاءِ الدُّنْيَا فَيُسْتَفْتَحُ لهُ، فلا يُفْتَحُ لهُ، ثُمَّ قَرَأَ:

لَا تُفَتَّحُ لَهُمْ أَبْوَابُ السَّمَاءِ قال : فَيَقُولُ اللَّهُ عَزَّ وجَلَّ: اكْتُبُوا كِتَابَه في سِجِّينٍ في الْأَرْضِ السُّفْلَى، قال : فَتُطْرَحُ رُوحُهُ طَرْحًا، قال : فتُعَادُ رُوحُهُ في جَسَدِهِ، ويَأْتِيهِ ملَكَانِ فَيُجْلِسَانِه، فيَقُولَانِ لَهُ: مَنْ رَبُّكَ؟ فيَقُولُ: هَاهَا لا أدْرِي، فَيَقُولَانِ لَهُ: ومَا دِينُكَ؟، فَيَقُولُ: هَاهَا لا أدْرِي فيَقُولانِ له : ما هذا الرَّجلُ الذي بُعِثَ فِيكُم ؟ فيَقولُ : هَاه هَاه لا أدْرِي ، فيُنادِي مُنادٍ من السماءِ : أنْ كَذَبَ عَبدِي ، فأفْرِشُوهُ من النارِ، وافْتَحُوا له بابًا إلى النَّارِ، قال : فَيَأْتِيهِ من حَرِّهَا وسَمُومِهَا، ويُضَيَّقُ عَلَيْهِ قَبْرُهُ، حتى تَخْتَلِفَ عَلَيْهِ أَضْلَاعُهُ، ويَأْتِيهِ رَجُلٌ قَبِيحُ الْوَجْهِ، وقَبِيحُ الثِّيَابِ، مُنْتِنُ الرِّيحِ، فَيَقُولُ: أَبْشِرْ بِالَّذِي يَسُوءُكَ هذا يَوْمُكَ الذي كُنْتُ تُوعَدُ، فَيَقُولُ: مَنْ أَنْتَ؟ فَوَجْهُكَ الْوَجْهُ يَجِيءُ بِالشَّرِّ، فَيَقُولُ: أنا عَمَلُكَ الخَبِيثُ فيَقُولُ: ربِّ لا تُقِمِ السَّاعةَ

صحيح الجامع ١٦٧٦

صحيح

Baraa’ Bin Caazib RC wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: adooonka mu’minka ah markii uu kasii tagaayo dunida oo uu kusii socdo aaqiro, waxaa kusoo daganeyso Malaa’ig wajiyadoodu nuurayaan sida qoraxda oo kale, waxayna wataan kafan kamida kafanyaasha Jannada, iyo Xanuud kamida Xanuuda Jannada, waxayna fadhiisanaayaan meel xooga u jirto qofka, kadibna Malakul Mowdka u imaanaayo wuxuuna fadhiisanaaya qofka madaxiisa agtiisa, wuxuuna leeyahay: nafyahay wanaagsan kusoo bax dambi dhaaf Alle ﷻ xagiisa ka ahaaday iyo raali ahaanshihiisa, waxayna naftasada uga baxeysaa qofka dhimanaayo sida biyaha ay tubada afkeeda ugaga soo baxaan oo kale, kadibna Malakul Mowdka nafsada qofka wuu qaada kadibna Malaa’igtii kale ayaa si dagdag ah nafsada qofka ugala wareegeyso, kadibna waxay u

galinaayan kafanka dhaxdiisa waxayna u marinaayan xanuudka, waxaana kasoo baxeyso nafsadaas caraf sida miskiga oo kale ah, taaso arlada oo dhan ay la carfi lahayd, samada ayay u qaadayaan markii ay Malaa'igta samada joogto lasii ag maraan, Malaa'igtii ayaa dhaheyso: maxaa waaye ruuxdaan sidaan u udgoon? Waxayna dhahaayaan: waa hebel hebel magacyadiisa aduunka loogu wici jiray kuwooda ugu fiicna ayay ugu yeerayaan, ilaa samada aduunyada ay ka gaaran, samada ayaa laga furaa, waxaana loogu shafeeco qaada samooyinka kale ee xiga samada aduunyada ilaa ay ka gaaran samada todobaad, Allah ﷻ wuxuu leeyahay: adoonkeyga ku qora kitaabka CILIYIINKA, adoonkeyga u celiya arlada, ayada ayaan ka abuurnay, ayadaana ku celinay, ayadaana kasoo saari doona maalinta Qiyaame, ruuxdiisa kusoo laabaneyso waxaana u imaanayaan labo malag, Munkar iyo Nakiir, way soo fadhiisinaayan, waxayna dhahaayaan: RABIGAADA waa kuma? Wuxuuna ku jawaabayaa: RABIGEYGA WAA ALLAH ﷻ, waxay dhahaayaan: DIINTAADA waa Diintee? Wuxuuna ku jawaabayaa: DIINTEEDA wa ISLAM, waxay ku dhahaayaan: NABIGAADA waa kuma? Wuxuuna ku jawaabayaa: NABIGEYGA waa MUXAMMED Rasuulkii Alle ﷺ, waxay ku dhahaayan: Cilmigee ku ogaatay? Wuxuuna ku jawaabayaa: Kitaabka Qur'anka ayaan aqriyay, waana aaminay waxa uu Alle ﷻ sheegay, waana rumeeyay, kadibna xaga samada ayaa laga dhawaaqayaa: adoonkeyga run ayuu sheegay, firaash ayaa Jannada looga keenayaa, Labisna waa loo keenayaa, Dariishadna waa loo furaaya wuxuuna ka daawana Jannada iyo booska uu halkaasi ku leeyahay, waxaana dariishadaas ugaga soo galaayo Jannada leerteeda

iyo carafteeda, qabrigiisa ayaa loo waasicina ilaa isha inta ay wax ka aragto, waxaa u imaanaayo qof waji qurxoon, dhar qurxoon wato misna caraf ay kasoo baxeyso, wuxuuna qofkaas leeyahay: ku bishaareyso wax ku farxad galiyo maanta waa maalintii lagu balan qaaday, kadibna qofkii dhintay ayaa su'aalayo qofkaan u imaaday asagoo la yaaban wuxuuna leeyahay: adiga kuma tahay? Wajigaada wuxuu u egyahay waji qeer badan?

Kadibna qofkii wajiga qurxoona ayaa ku jawaabaayo: aniga waxaan ahay camalkaadii wanaagsanaa, kadibna qofkii dhintay ee qabrigiisa ku jiray wuxuu leeyahay Rabiyoow may saacada qiyaame dhacdo waxaan aadi lahaa ehelkeyga iyo maalkeyga, laakiin

adoonka gaalka ah markii uu kasii tagaayo dunida oo uu kusii socdo aaqiro, waxaa kusoo daganeyso Malaa'ig wajiyadoodu madowyihiin , waxayna wataan masuux, waxayna fadhiisanaayaan meel xooga u jirto qofka, kadibna Malakul Mowdka u imaanaayo wuxuuna fadhiisanaaya qofka madaxiisa agtiisa, wuxuuna leeyahay: nafyahay xun kusoo bax carrada Alle ﷻ iyo cadaabkiisa, kadibna nafsadii jirkiisa ayay ku dhageysaa waxaana nafsada loogaga siiba sida suuf qodxo ku dhagay oo kale , macnaha nafsada loogaga qaada si dhib badan oo cadaab leh, kadibna Malakul Mowdka nafsada qofka wuu qaada kadibna Malaa'igtii kale ayaa si dagdag ah nafsada qofka ugala wareegeyso, kadibna waxay umarinaayaan masuuxa, waxaana kasoo baxeyso nafsadaas ur saaid ah, taaso haddii ay arladaan kuso gaari lahayd nolosha oo dhan fasahaadin lahayd ur dartiis, samada ayay u qaadayaan markii ay Malaa'igta samada

joogto lasii ag maraan, Malaa'igtii ayaa dhaheyso: maxaa waaye ruuxdaan sidaan u ureyso? Waxayna dhahaayaan: waa hebel hebel magacyadiisa aduunka loogu wici jiray kuwooda ugu xumaa ayay ugu yeerayaan, ilaa samada aduunyada ay ka gaaran, samada ayaa loo diidaa in laga furo, wuxuuna aqriyay Nabiga ﷺ aayadaan: Looma furaayo Samada, mana galaayaan Jannada ilaa geela uu ka galo cirbida duleelkeeda, Allah ﷻ wuxuu leeyahay: adoonkeyga ku qora kitaabka SIJIILKA ee yaalo arlada todobaad, Waxaana lagu soo tuurayaa dhulka,qofka waxaa lagu soo celinaa ruuxdiisa, waxaana u imaanayaan labo malag, Munkar iyo Nakiir, way soo fadhiisinaayan, waxayna dhahaayaan: RABIGAADA waa kuma? Wuxuuna ku jawaabayaa: Haah Haah ma aqaani, waxay dhahaayaan: DIINTAADA waa Diintee? Wuxuuna ku jawaabayaa: Haah Haah ma aqaani , waxay ku dhahaayaan: NABIGAADA waa kuma? Wuxuuna ku jawaabayaa: Haah Haah ma aqaani, waxay ku dhahaayan: Waa kuma ninka ladinka soo dhax saaray? Wuxuuna ku jawaabayaa: Haah Haah ma aqaani, kadibna xaga samada ayaa laga dhawaaqayaa: adoonkeyga been ayuu sheegay, firaash ayaa Jahanamo looga keenayaa, Dariishadna waa loo furaaya wuxuuna ka daawana Jahanamo iyo booska uu halkaasi ku leeyahay, waxaana dariishadaas ugaga soo galaayo Naarta leerteeda iyo urkeeda, qabrigiisa ayaa lagu cariirinaa ilaa ay feerihiisa isdhaafan, waxaa u imaanaayo qof waji foolxun, dhar uraayo wato misna qurun uu kasoo baxaayo, wuxuuna qofkaas leeyahay: ku bishaareyso wax ku dhibo maanta waa maalintii lagu balan qaaday, kadibna qofkii dhintay ayaa

su'aalayo qofkaan u imaaday asagoo la yaaban wuxuuna leeyahay: adiga kuma tahay? Wajigada wuxuu u egyahay waji shar badan

Kadibna qofkii wajiga foolxuma ayaa ku jawaabaayo: aniga waxaan ahay camalkaadii xumaa, kadibna qofkii dhintay ee qabrigiisa ku jiray wuxuu leeyahay Rabiyoow saacada qiyaame yeysan dhacin.

Saxiixu Jaamic 1676, Saxiix.

****

Runtii xadiithkaan waxaa ka muuqato cabsi weyn taaso ruux walbo loo baahanyahay maalintaan in uu u diyaar garoobo waayo aduunyadaan aad arkeysid waxba ma ahan markii loo eego aaqiro.

Qofka marka qabriga lagu duugo malaa'igta ma Godka ayay ugu imaanayaan mase caalamka Barzaqa?

■ Waxaa laga yaaba dad badan iney ku qaldamaan farqiga u dhaxeeyo Godka iyo Caalamka Barzaqa, waayo godka waxaa lagu duugay jir uu waqtigiisa dhamaaday oo wax micno ah ku fadhinin, waxaa laga yaaba haddii ay dadka yiraahdaan bal aan soo fiirino qofkii aan saacado ka hor duugnay ma u yimaadeen malaa'igtii cadaabka, mala cadaabay mase! Markii ay Godka faagan waxay u tagaayaan jirkii oo sidii ay u dhigeen u yaalo, lakiin qofka dhintay ee ay malaa'igta u imaaneyso wuxuu jooga Caalamka Barzaqa qofka nafsadiisa, dareemahiisii jirka ku jiray nooc walbo iyo ruuxdii ka dhaqdhaqaajineysay ayaa lala baxaa kadibna caalamkaas ayaa la geynaa meeshaas ayayna labada malag ugu

imaanayaan! Marka ruuxdii, nafsadii iyo dareenkii oo ah jir kale oo jirkada ku dhax qarsoon oo is wato ayaa lasoo fadhiisinaa oo su'aalaha la weydiina. Culumada qaar ayaa yiraahdaan caalamka barzaqa waa caalam ruux iyo jismi lagu joogaayo marka jirkii aduunyadaan maadama God lagu aasay Alle ﷻ wuxuu u diyaarinaa qofka jir kale oo ka duwan jirka maanta uu aduunyada ku joogo sida uu tilmaamayo Xadiithka ku sugan Saxiix Al-Bukhaari gaar ahaan Kitaab Al- Janaa'iz 1386, xadiithkaan wuxuu tilmaamayaa caalam waaqici ah, dad jir ahaan loo cadaabayo waa dhul fidsan oo taag iyo buuro, iyo wabiyaal dhiig ah iyo meel sida tinaarkii oo kale ah oo ay dad ku gubanaayaan sida lagu sheegay axaadiiththii israa' walmicraajka kawaramayo. Marka marba haddii lagu yiri waa nolol iyo caalam kale magaciisana lagu sheegay Barzaq ogoow Nabiga ﷺ inuusan ku hadlin mala awaal ama wax asaga uu iska yiri lakiin Alle ﷻ uu u sheegay Caalamkaan inuu yahay caalam jiro oo run ah nolol cadaab iyo nimco ka sameysana ay Caalamkaas yaalan.

Nabiga ﷺ wuxuu yiri:

واللهِ ما الدنيا في الآخرةِ إلا مثلَ ما يجعلُ أحدُكم إصبعَه في اليمِّ، فلينظر بم يرجعُ

فتح الباري لابن حجر ٢٣٦/١١ إسناده إلى التابعي على شرط البخاري أخرجه مسلم (٢٨٥٨)

Walahi baan ku dhaartaye aduunyadaan markii aaqiro loo fiiriyo, waa sida axadkiina oo fargaliyay biyaha bada kadibna eegay fartiisa dhibicda

soo raacday ee biyaha ah(taaso hadane bada kulaabaneyso, macnaha dhibicda biyaha ah ee fartiina soo raacday waa aduunyada badaas saas u weyna waxay tusaale u tahay aaqiro iney ka weyn tahay aduunyada).

Fatxul Baari, Ibnu Xajar 11/236, Isnaadkiisa waxaa laga raad raaca Shardiga Al-Bukhaari, Muslimna wuxuu kusoo saaray 2858. Waa saxiix.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿وَلَلْآخِرَةُ خَيْرٌ لَّكَ مِنَ الْأُولَىٰ ۝٤﴾

(Adh-Dhuha - 4)

Aakharana kaaga khayr badan Aduunka.

Aduunyadaan waxaa ka qeyr badan aaqiro mana ahan wax isku dhaw ama isku mid laga dhigi karo. Aduunyada gaal iyo muslim wixii nasiibkooda ah way kawada cunaan hasa ahaate waxaa qasaaray qof aduunyadaan inuu hanti helo darteed u gaaloobay ama xaaran u cunay ama daraadeed dad u halaagay.

Qofka markii uu dhinto waxaa raaco sadax sida uu sheegay Nabiga ﷺ waxaa raaco maalkiisa, ehelkiisa iyo camalkiisa, ehelkiisa iyo maalkiisa way kasoo haraayan waxaana godka kula hari doono camalkiisa.

Nabiga ﷺ wuxuu yiri:

يتبعُ الميِّتَ ثلاثٌ فيرجِعُ اثنانِ ويبقى واحِدٌ يتبعُه أَهلُه ومالُه وعملُه فيرجعُ أَهلُه ومالُه ويبقى عملُهُ

أخرجه البخاري (٦٥١٤)، ومسلم (٢٩٦٠)، والترمذي (٢٣٧٩) ثابت صحيح

Meydka waxaa raaco sadax, labo wey soo haraan halka kalena waa uu la jooga, ehelkiisa, maalkiisa iyo camalkiisa ayaa raacaan, ehelkiisa iyo maalkiisa way soo laabtaan, camalkiisa wuu la jooga.

Waxaa soo saaray Al-Bukhaari 6514, Muslim 2960, Tirmidi 2379. Waa xadiith sugan saxiix ah.

****

Cutubka 2aad: Su'aalaha qabriga iyo labada malag Munkar iyo Nakiir.

Nabiga ﷺ wuxuu yiri:

إنَّ القبرَ أوَّلُ منزِلٍ من مَنازِلِ الآخِرَةِ، فإنْ نجا منهُ فما بعدَهُ أيْسَرُ منهُ، وإنْ لم ينْجُ منهُ فما بعدَهُ أشدُّ منهُ. قالَ: وقالَ رسولُ اللهِ: ما رأيتُ منْظَرًا قطُّ إلا القبْرَ أفْظَعَ منهُ

سنن الترمذي ٢٣٠٨

حسن غريب لا نعرفه إلا من حديث هشام بن يوسف

Qabriga waa guriga ugu horeeyo ee guryaha qiyaame, haddii uu qofka ka badbaado fitnada qabriga wixii intaas kadambeeyo way u fududaan, haddiise uusan ka badbaadin qofka fitnada qabriga wixii intaas ka dambeeyo way ku adkaan doonta.

Sunan At-Tirmidi 2308

Abuu Ciisaa wuxuu yiri: Xadiithka waa xasan gariib ah mana garaneeno ilaa xadiithkii hishaam bin yuusuf mooye.

Sida uu sheegay Rasuulkeena Muxammed ﷺ qabriga waa guriga ugu horeeyo ee guryaha qayaame qofka markii qabriga la dhigo haddii uu fitnada qabriga ka badbaado waxaa u fududaaneyso maalinta Qiyaamo inuu badbaado, haddiise uusan ka badbaadin fitnada qabriga waxaaa adkaan doonto inuu ka badbaado cadaabka maalinta Qiyaame.

Sidoo kale waxaa laga waryay Rasuulkeena Muxammed ﷺ inuu sheegay in qabriga uu jiro cadaab iyo waliba ciqaab adag taaso ay muteesan doonaan kuwa Allah ﷻ ku Gaaloobay, Munaafiqiinta, Mulxidiinta iyo qaar kamida kuwa Muslim ahaa lakiin dambiyo waaweyn caadeystay noloshaan oo aanan ka towbad keenin.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

استجيروا باللهِ من عذابِ القبرِ؛ فإنَّ عذابَ القبرِ حقٌّ

صحيح الجامع ٩٣٢

أخرجه النسائي في «السنن الكبرى» (٧٧٢٠)

صحيح

Ka acuudu bileysta cadaabka qabriga, maxaa yeelay cadaabka qabriga waa xaq.

Saxiix Jaamic 932

Waxaa kaloo kusoo saaray An-Nisaa'i Sunan Al-Kubraa 7720. Xadiithkaan waa saxiix.

Qabri waxaa jiro cariiri iyo cadaabka oo kasii daran. Qof walbo la duugo cariirigaas wuu galaa Muslim iyo Gaal iyo Munaafaq iyo Diin laawe intaba.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

إنَّ للقبرِ ضَغْطَةً لو كان أحدٌ ناجٍ منْها لَنَجا منْها سَعْدُ بْنُ معاذٍ

مجمع الزوائد ٤٩/٣ رجاله رجال الصحيح

Qabriga waxaa dhaxdiisa ahaaday cariiri, haddii uu jiro axad ka badbaadayo cariirigaasna waxa ka badbaadi lahaa Sacad Binu Mucaad.

Mujmacu Zawaahid 3/49, Raga xadiithkaan waryay waa Rag saxiix ah(Macnaha xadiithka kama been abuurtaan jeebkoodana kama alifan axaadiithta).

Saxaabiga Sacad Binu Mucaad wuxuu Islamka qaatay asagoo 31 sano jiro, wuxuuna dhintay asagoo 37 sano jir ah, markii uu dhintay waxaa murugo darteed dhaqaaqay Carshiga Allah ﷻ albaabada samooyinkana waa loo furay, Janaasadiisana waxaa kasoo qeeb galeen 70,000 oo kamida Malaa'iga Alle ﷻ. Wuxuu ahaa saxaabi aad u qiimo badan Alle ﷻ ayaa aad u jeclaa.

Sida inbadan lagu sheegay sunnada Rasuulkii Alle ﷺ marka qofka ay kasoo tagaan dadkii duugay oo ay nafta kusoo laabato waxaa u imaanayaan labo malag sida ka muuqato Xadiithkaan:

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

يا عمرُ، كيف بك إذا أنت متَّ فقاسوا لك ثلاثةَ أَذْرُعٍ وشبرٍ في ذراعٍ وشبرٍ، ثم رجعوا إليك فغسَّلوك وكفَّنوك وحنَّطوك، ثم احتملوك حتى يضعُوك فيه، ثم هَيَّلوا عليك التراب، فإذا انصرفوا عنك أتاك فتّانا القبرِ: مُنكَرٌ، ونكيرٌ، أصواتُهما كالرَّعدِ القاصفِ، وأبصارُهما مثلُ البرقِ الخاطفِ، فتَلْتَلاك وتَرْتَراك وهَوَّلاك، فكيف بك عند ذلك يا عمرُ؟ قال: يا رسولَ اللهِ، ومعي عَقْلي؟ ! قال ﷺ: نعم. قال رضيَ اللهُ عنه: إذًا أَكفِيكَهما

المطالب العالية ٩٧/٥

رجاله ثقات مع إرساله

Cumaroow, sidee dareemi lahayd haddii aad dhimatid kadibna laguu diyaariyo god sadax dhudhun ah dhaxdiisana hal dhudhun iyo taako tahay, kadibna dadka kusoo laabtaan oo ay ku dhaqaan kadibna karfan kugu duubaan, kadibna xanuudhka meydka kuu mariyaan, kadibna ku qaadan ilaa ay godka kugu ridaan, kadibna ciida kugu shubaan, kadibna markay kasoo tagaan waxaa ku imaanaayan kuwa Alle ﷻ uu dadka qabriga ku jiro ku fitneeyay: Munkar iyo Nakiir, codadkooda waa sida gugaca oo kale, indhahoodana waa sida biriqda oo kale, kadibna su'aalan, kadibna ku halaagan arintaas hadey kugu dhici lahayd maxaa sameyn laheyd Cumaroow? Wuxuu yiri Cumar RC: Rasuulkii Allow ﷺ markii aan qabriga galo ogaalkeyga ma sidaan hada ahay ayaan sii ahana? Rasuulkii Alle ﷺ Wuxuu yiri: haa, Cumar RC wuxuu yiri: hadaba anaa u diyaar garoobaayo.

Madaalibul Caaliya 5/98, Raga xadiithkaan waryeen waa Rag lagu kalsoonaan karo.

Sida aan kusoo xusnay Pageka 20aad, meydka markii qabriga la dhigo dadkuna kasoo dureersadaan waxaa lagu soo celina nafsada, kadibna

waxaa u imaanayaan labo malag oo lakala yiraahdo Munkar iyo Nakiir waxayna weydiinaayaan sadax Su'aalo, lakiin malaa'igtaas muuqaal ahaan sidee ayay u egyihiin?

Rasuulkeena Muxammed ﷺ wuxuu sheegay in labadaas malag muuqaalkooda aad loogaga cabsanaayo sida uu u tilmaamayna waa si cajiib ah waxaana lagu sheegay qisadii Israa' Wal Micraaj.

عن عبدالله بن عباس: خبر الإسراء: أنَّ النبيَّ صلَّى اللهُ عليه وسلَّم قال: قلتُ: يا جبريلُ وما ذاك؟ قال: منكر ونكير يأتيان كلَّ إنسانٍ مِن البَشَر حين يوضَعُ في قبره وحيدًا، فقلت: يا جبريلُ، صِفْهما لي، قال: نعم، مِن غير أن أذكُرَ لك طولَهما وعَرضَهما، ذِكر ذلك منهما أفظَعُ من ذلك، غيرَ أنَّ أصواتَهما كالرَّعد القاصف، وأعينُهما كالبرق الخاطف، وأنيابُهما كالصياصي، يخرجُ لهبُ النار من أفواههما، ومناخرهما ومسامِعهما، يكسحانِ الأرضَ بأشعارهما، ويحفرانِ الأرض بأظفارِهما، مع كل واحدٍ منهما عمودٌ من حديد، لو اجتمع عليه مَن في الأرض ما حرَّكوه يأتيان الإنسانَ إذا وُضِعَ في قبره وتُرِكَ وحيدًا، يسلكانِ رُوحَه في جسَدِه بإذن الله تعالى، ثمَّ يُقعِدانِه في قبرِه، فينتهرانِه انتهارًا يتقعقَعُ منه عظامُه، وتزول أعضاؤه مِن مفاصِلِه، فيخِرُّ مغشيًّا عليه، ثم يقعدانه فيقولان له: إنَّك في البرزخ فاعقِلْ حالك، واعرِفْ مكانك، وينتهرانه ثانيةً ويقولان: يا هذا ذهبَت عنك الدنيا وأفضيتَ إلى معادِك فأخبِرْنا من ربُّك؟ وما دينك؟ ومن نبيك؟ فإن كان مؤمنًا بالله لقَّنَه الله حجَّتَه، فيقول: الله ربي ونبيي محمَّد، وديني الإسلام

التذكرة للقرطبي ١٢٩

Cabdullaahi Bin Cabaas waxaa laga waryay: aqbaartii Israa' wal micraaj habeenkii la dheelminaaye, in Nabiga ﷺ uu yiri: Jibriil kuwaas yaawaaye? Jibriil CS wuxuu yiri: Munkar iyo Nakiir ayaa la kala yiraahda, insaan walbo basharka kamida qabrigiisa ayay ugu yimaadan markii lagu rido qabrigiisa asagoo kaligiisa ah, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu

yiri: Jibriiloow sifahooda iisheeg, Jibriil ayaa yiri: haa, lakiin kuuma sheegaayi dhirirkooda iyo balacooda, waayo inaan kuu sheego way kasii foolxumo badan tahay sifahaan ku sheegi doono, codadkoodu waa sida gugaca oo kale, indhahoodana waa sida biriqda oo kale, miciyo dhaadheer ayay leeyihiin, afkooda , sankooda iyo dhagahooda waxaa kasoo baxo holac naara, cidiyahooda ayay dhulka ku qodaayaan markii ay soo socdaan, mid walbo ayaga kamida wuxuu wataa bir naar ah, haddii ay kulmaan waxa dhulka ku nool oo idil aysan dhaqaajin karin(macnaha birtaas ay wataan haddii aduunyada lasoo dhigo kadibna leyskugu waco waxa arlada kunool oo idil oo bani aadam ah kadibna ay iskugu tagaan ma dhaqaajin karaan culeeskeeda kaliya), insaanka markii qabriga la dhigo way u imaanaayaan, asagoo kaligiisa ah, ruuxdiisa ayaa jirkiisa kusoo laabaneyso Ilaahey ﷻ idinkiisa, kadibna qabrigiisa ayaa lasoo fadhiisina, ayagoo waliba canaan kulul canaanayaan canaantaaso lafahiisa ay la gariiraayaan, kala goosyada lafahiisana way kala baxaayaan kadibna wuu dhacaa asagoo suuxsan, kadibna way soo fadhiisinaayan waxayna dhahaayaan: adiga waxaad joogta Barzaqa, ogaal yeelo oo makaankaada garo kadibna markale ayay canaananaayan waxayna dhahaayan: midkaagaan aduunyada waad kasoo tagtay wayna kaaga soo dhamaatay inaad u laabatid, noo sheeg Rabigaada waa kuma? Diintaada waa diintee? Nabigada waa kuma? Haddii uu Mu'min yahay Alle ﷻ ayaa u laqinaayo xujada wuxuuna leeyahay: Rabigeyga waa Alle ﷻ, Nabigeyga waa Muxammed ﷺ , Diinteeda waa Islam.

Qurdubi 129.

Runtii xadiithkaan sida ku cad labadaan malag aad iyo aad ayay u cabsi badanyihiin, waxa kaliya ee loogaga badbaadi karana waa in Allah ﷻ laga cabsado amarka Rasuulkiisa ﷺ la qaato diinta islamkana sida ay na fareeso ugu dhaqanaa.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

إذا دخلَ الميِّتُ القبرَ، مُثِّلَتِ الشَّمسُ عندَ غُروبِها، فيجلسُ يمسحُ عَينَيهِ، ويقولُ: دَعوني أصلِّي

صحيح ابن ماجه ٣٤٦٦
أخرجه ابن ماجه ٤٢٧٢
حسن

Markii qofka mu'minka ah qabriga uu galo, jawiga waxaa loogaga dhiga sida qorax sii dhaceyso oo kale, macnaha caalamka barzaqa ayuu kasoo toosa asagoo ismoodo inuu dunida joogo, wuxuu soo fadhiisana indhahiisa ayuu masaxaa, wuxuuna leeyahay: iga leexda aan duktee!

Saxiix Ibnu Maajah 3466, sidoo kale Ibnu Maajah ayaa kusoo saaray xadiithka numberkiisu yahay 4272 Xadiithkan waa xasan.

Haddaba xadiithkaan wuxuu cadeyna in qofka muslimka ahaa shanta salaadood dukan jiray aduunyadaan uu nolol farxad leh ku noolaan doono nolosha barzaqa. Nolosha barzaqa waa nolol xaqiiqo ah waana nolol aad ku noolaaneysid caalam ka duwan kan hadda aad ku nooshahay. Nolosha barzaqa waa nolol ruux iyo jasad ahaan aad ku joogeysid cadaabkeeda iyo nimcadeedana aad u dareemi doontid sida aad hada u dareemeysid haddii dab aad ku gubatid iyo hadaad nolo raaxo leh ku jirtid. Mudada nolosha barzaqa waa mudada u dhaxeyso

aduunyada ilaa maalinta Qiyaamaha.

****

Cutubka 3aad: Nolosha Barzaqa iyo cadaabka halkaas yaalo

Nolosha barzaqa waa xaqiiqo ma ahan qayaali, iyo wax la inkiri karo ama leyska indho tiri karo ciddii dood ka keentana way ku gaaloobeysaa, taasina waxaa cadeen u ah, malakul mowdka ma aragno hadana waxaan maalin walbo marqaati ka nahay dadyow kala duwan in uu nafta ka qaado oo aan aragno qofkii dhaqdhaqaaqayay oo halmar sidii wax la damiye camal iska aamusan oo aanan hadal lahayn, iyo dhaqaaq toona, maxaase diidaayo kuwaana iney kugu yimaadan qabriga waliba ayagoo muuqaal laga cabsanaayo leh. Waxyaabaha geybka ah oo aanan la inkiri karin muslim iyo gaalna ay isku raaceen waxaa kamid ah:

Nafsada: Nafsada xumaanta na farto ma aragno, haddii maanta lagu yiraahdo nafsadada soo bixi na tus ma awoodid hadana gaal iyo muslimna waa wax ay isku raaceen nafsada ineysan muuqanin hasa ahaate ma ahan wax la arki karo.

Ruuxda: ruuxda jirkeena ka dhaqdhaqaajiso ma aragno hadana waan aaminsanahay gaal iyo muslimna waa leysku raacay iney tahay mid jirto ayada la'aanteedna jirka ma dhaqaaqayo, qofkii ruuxdaas beeniyana dhamaan waxaa leysku raaca inuu yahay ruux waalan. Hadaba ruuxdada haddii lagu yiraahdo soo bixi na tus ma awoodid waayo ma ahan wax la arki karo.

Dareemaha: dareemaha jirka ku jiro kasoo bilaaw madaxa ilaa lugaha dareemahaas ma ahan wax la arko hadana waa xaqiiqo cid inkiri karto ma jirto gaal iyo muslim intaba, haddii lagu dhaho dareemahada soo bixi na tus ma awoodid waana waxyaabaha aanan la arki karin hasa ahaate wax lagu kala garto oo dareemahaas waxay muhiim u yihiin nolosheena ayaga la'aantoodna nolosha ma dhadhameyso.

Xanuunka: xanuunka waan naqaana inuu xanuun yahay oo marba meel naga qabto, mararka qaar waxaa dhahda xanuun ayaa meeshaas iga haayo, hadaba haddii lagu yiraahdo xanuunka dhan jirkaada kasoo siib si uusan mar dambe kuu qabanin ma awoodid waayo xanuunka qaab ahaan siduu u egyahay ma taqaanid hadana waa aragtay sida uu dhulka kuu dhigaayo.

Hadaba intaan oo dhan oo isku xiran ayaa caalamka barzaqa la geynaa kadibna waxaa dareemi doonta xanuunka aduunka aad ku dareemeysid mid kasii daran. Waxaa wanaagsan inaad ka fikirtid Allahii ku abuuray oo aanan loo jeedin oo intaan aan soo sheegnay abuuray inaad ka xishootid, sababtoo ah hadaadan u jeedin asagaa marwalbo iyo meel walbo kuu jeedo.

Noloshaan aduunyada ma ahan mid qiimo leh waayo Alle ﷻ agtiisa way ka liidataa garabka kaneecada, waxaase liibaanay qofkii dusheeda ku cibaadeysto kuna dukto salaadaha shanta ah.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu sheegay in ay jirto nolol kale oo uu galaayo qofka dhintay taaso noqon karto cadaab joogto ah ilaa maalinka qiyaame ama nimco joogto ah ilaa maalinta qiyaame.

Sida ku sugan xadiithkaan uu warinaayo Samura Bin Jundub RC,

عَنْ سَمُرَةَ بْنِ جُنْدَبٍ قَالَ: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا صَلَّى صَلاَةً أَقْبَلَ عَلَيْنَا بِوَجْهِهِ فَقَالَ: ((مَنْ رَأَى مِنْكُمُ اللَّيْلَةَ رُؤْيَا)). قَالَ فَإِنْ رَأَى أَحَدٌ قَصَّهَا، فَيَقُولُ مَا شَاءَ اللَّهُ، فَسَأَلَنَا يَوْمًا، فَقَالَ: ((هَلْ رَأَى أَحَدٌ مِنْكُمْ رُؤْيَا)). قُلْنَا لاَ. قَالَ: ((لَكِنِّي رَأَيْتُ اللَّيْلَةَ رَجُلَيْنِ أَتَيَانِي فَأَخَذَا بِيَدِي، فَأَخْرَجَانِي إِلَى الأَرْضِ الْمُقَدَّسَةِ، فَإِذَا رَجُلٌ جَالِسٌ، وَرَجُلٌ قَائِمٌ بِيَدِهِ كَلُّوبٌ مِنْ حَدِيدٍ- قَالَ بَعْضُ أَصْحَابِنَا عَنْ مُوسَى إِنَّهُ- يُدْخِلُ ذَلِكَ الْكَلُّوبَ فِي شِدْقِهِ، حَتَّى يَبْلُغَ قَفَاهُ، ثُمَّ يَفْعَلُ بِشِدْقِهِ الآخَرِ مِثْلَ ذَلِكَ، وَيَلْتَئِمُ شِدْقُهُ هَذَا، فَيَعُودُ فَيَصْنَعُ مِثْلَهُ. قُلْتُ مَا هَذَا قَالاَ انْطَلِقْ.

فَانْطَلَقْنَا حَتَّى أَتَيْنَا عَلَى رَجُلٍ مُضْطَجِعٍ عَلَى قَفَاهُ، وَرَجُلٌ قَائِمٌ عَلَى رَأْسِهِ بِفِهْرٍ أَوْ صَخْرَةٍ، فَيَشْدَخُ بِهِ رَأْسَهُ، فَإِذَا ضَرَبَهُ تَدَهْدَهَ الْحَجَرُ، فَانْطَلَقَ إِلَيْهِ لِيَأْخُذَهُ، فَلاَ يَرْجِعُ إِلَى هَذَا حَتَّى يَلْتَئِمَ رَأْسُهُ، وَعَادَ رَأْسُهُ كَمَا هُوَ، فَعَادَ إِلَيْهِ فَضَرَبَهُ، قُلْتُ مَنْ هَذَا قَالاَ انْطَلِقْ.

فَانْطَلَقْنَا إِلَى ثَقْبٍ مِثْلِ التَّنُّورِ، أَعْلاَهُ ضَيِّقٌ وَأَسْفَلُهُ وَاسِعٌ، يَتَوَقَّدُ تَحْتَهُ نَارًا، فَإِذَا اقْتَرَبَ ارْتَفَعُوا حَتَّى كَادَ أَنْ يَخْرُجُوا، فَإِذَا خَمَدَتْ رَجَعُوا فِيهَا، وَفِيهَا رِجَالٌ وَنِسَاءٌ عُرَاةٌ. فَقُلْتُ مَنْ هَذَا قَالاَ انْطَلِقْ.

فَانْطَلَقْنَا حَتَّى أَتَيْنَا عَلَى نَهَرٍ مِنْ دَمٍ، فِيهِ رَجُلٌ قَائِمٌ عَلَى وَسَطِ النَّهَرِ رَجُلٌ بَيْنَ يَدَيْهِ حِجَارَةٌ، فَأَقْبَلَ الرَّجُلُ الَّذِي فِي النَّهَرِ، فَإِذَا أَرَادَ أَنْ يَخْرُجَ رَمَى الرَّجُلُ بِحَجَرٍ فِي فِيهِ، فَرَدَّهُ حَيْثُ كَانَ، فَجَعَلَ كُلَّمَا جَاءَ لِيَخْرُجَ رَمَى فِي فِيهِ بِحَجَرٍ، فَيَرْجِعُ كَمَا كَانَ. فَقُلْتُ مَا هَذَا قَالاَ انْطَلِقْ.

فَانْطَلَقْنَا حَتَّى انْتَهَيْنَا إِلَى رَوْضَةٍ خَضْرَاءَ، فِيهَا شَجَرَةٌ عَظِيمَةٌ، وَفِي أَصْلِهَا شَيْخٌ وَصِبْيَانٌ، وَإِذَا رَجُلٌ قَرِيبٌ مِنَ الشَّجَرَةِ بَيْنَ يَدَيْهِ نَارٌ يُوقِدُهَا، فَصَعِدَا بِي فِي الشَّجَرَةِ، وَأَدْخَلاَنِي دَارًا لَمْ أَرَ قَطُّ أَحْسَنَ مِنْهَا، فِيهَا رِجَالٌ شُيُوخٌ وَشَباب، وَنِسَاءٌ وَصِبْيَانٌ، ثُمَّ أَخْرَجَانِي مِنْهَا فَصَعِدَا بِي الشَّجَرَةَ فَأَدْخَلاَنِي دَارًا هِيَ أَحْسَنُ وَأَفْضَلُ، فِيهَا شُيُوخٌ وَشَباب. قُلْتُ طَوَّفْتُمَانِي اللَّيْلَةَ، فَأَخْبِرَانِي عَمَّا رَأَيْتُ. قَالاَ نَعَمْ، أَمَّا الَّذِي رَأَيْتَهُ يُشَقُّ شِدْقُهُ فَكَذَّابٌ يُحَدِّثُ بِالْكَذْبَةِ، فَتُحْمَلُ عَنْهُ حَتَّى تَبْلُغَ الآفَاقَ، فَيُصْنَعُ بِهِ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ.

وَالَّذِي رَأَيْتَهُ يُشْدَخُ رَأْسُهُ فَرَجُلٌ عَلَّمَهُ اللَّهُ الْقُرْآنَ، فَنَامَ عَنْهُ بِاللَّيْلِ، وَلَمْ يَعْمَلْ فِيهِ بِالنَّهَارِ، يُفْعَلُ بِهِ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ. وَالَّذِي رَأَيْتَهُ فِي الثَّقْبِ فَهُمُ الزُّنَاةُ. وَالَّذِي رَأَيْتَهُ فِي النَّهَرِ آكِلُو الرِّبَا. وَالشَّيْخُ فِي

أَصْلِ الشَّجَرَةِ إِبْرَاهِيمُ- عَلَيْهِ السَّلاَمُ- وَالصِّبْيَانُ حَوْلَهُ فَأَوْلاَدُ النَّاسِ، وَالَّذِي يُوقِدُ النَّارَ مَالِكٌ خَازِنُ النَّارِ. وَالدَّارُ الأُولَى الَّتِي دَخَلْتَ دَارُ عَامَّةِ الْمُؤْمِنِينَ، وَأَمَّا هَذِهِ الدَّارُ فَدَارُ الشُّهَدَاءِ، وَأَنَا جِبْرِيلُ، وَهَذَا مِيكَائِيلُ، فَارْفَعْ رَأْسَكَ، فَرَفَعْتُ رَأْسِي فَإِذَا فَوْقِي مِثْلُ السَّحَابِ. قَالاَ ذَاكَ مَنْزِلُكَ. قُلْتُ دَعَانِي أَدْخُلْ مَنْزِلِي. قَالاَ إِنَّهُ بَقِيَ لَكَ عُمُرٌ لَمْ تَسْتَكْمِلْهُ، فَلَوِ اسْتَكْمَلْتَ أَتَيْتَ مَنْزِلَكَ)).

صحيح البخاري ١٣٨٦ صحيح

Samura Bin Jundub wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ markii uu salada Subax na dujiyo wuu noso jeesan jiray asagoo dhahaayo: xalay yaa riyo arkay oo idinka mid ah? Haddii uu mid naga mida arkay riyo wuu u fasiri jiray wuxuuna dhihi jiray wixii uu Alle ﷻ doonay, maalin maalmaha kamida ayuu na su'aalay: yaa xalay riyo arkay oo idinka mida? Waxaan dhahnay maya ma arkin, kadibna Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: lakiin aniga xalay waxaan arkay riyo, labo nin ayaa ii yimaadeen gacanta ayay i qabteen waxayna igeeyeen arladii muqadaska, dhul isla siman, waxaana arkay nin fadhiyo iyo nin kale oo kortaagan, gacanta ku haasto bir sidii maqaalinta oo kale qaloocan, kadibna canka midig ayuu ka galina ilaa qadaadka ayuu kaga jeexa, kadibna canka bidix ayuu ka galina ilaa qadaadka kale ayuu jeexa, intuu dhinaca bidix ku maqanyahay dhinaca midig sidiisa hore ayuu kuso laabana, kadibna waxaan ku iri labadii nin: kuwaan maxay ahaayeen?! Waxayna i dhaheen: soo bax, waan soo baxnay ilaa aan kaga nimid nin dhabarka u jiifo, iyo nin kale oo kor taagan gacantana ku haayo dhagax weyn wuxuuna kaga sii daynaa madaxa, markii uu ku dhufto dhagaxa madaxa ayaa ka jajabaayo dhagaxiina wuu dildilooma wuxuuna aadaya dhankii dhagaxa si uu usoo qaato, intuu dhagaxa soo qaadashadiisa ku

maqanyahay ninkii madaxiisa uu jajabaaye sidiisa ayuu kuso laabana, kadibna wuu usoo laabana ninkii kale asagoo dhagaxii wato madaxa ayuu kaga dhufana, kadibna waxaan ku iri labadii nin: kuwaan maxay ahaayeen?! Waxayna i dhaheen: soo bax, waan soo baxnay ilaa aan ka nimid meel duleel madow sidii tinaarkii oo kale ah, dusha sare uu u dhuubanyahay, qeebtiisa hoosana waa waasac, dhaxdiisana waxaa ka shidnaa dab, markii dabka uu soo dhawaado kor ayay soo aadayaan, ilaa ay u dhawaadan in ay soo baxaan, markii uu dabka dagana hoos ayay adaayaan, waxaana ku dhax jiray niman iyo naago qaaqaawan, kadibna waxaan ku iri labadii nin: kuwaan maxay ahaayeen?! Waxayna i dhaheen: soo bax, waan soo baxnay ilaa aan nimid wabi dhiig ah dhaxdiisa waxaa taagan nin, ninkala hortaagan oo gacanta dhagax ku haasto, waxaa u imaanaayo ninkii wabiga dhax taagnaa markii uu isku dayo inuu wabiga ka baxo ninkii dhagaxa haastay ayaa ninka rabay inuu baxo ayuu dhagax afka u galina, wuxuuna ku laabana meeshii uu ka yimid, marwalbo ninka isku dayo inuu wabiga ka baxo ninka kale ayaa dhagax afka u galinaayo kadibna wuxuu ku laabana meeshii uu ka yimid, kadibna waxaan ku iri labadii nin: kuwaan maxay ahaayeen?! Waxayna i dhaheen: soo bax,

Waan soo baxnay ilaa aan ka nimid dhul doog ah aad iyo aad u weyn qurux badan, dhulkaas waxaa ku dhaxyaalay geed aad iyo aad u weyn, geedkaas hooskiisa waxaa joogeen nin oday ah iyo caruur yar yar, nin kale ayaa geedkaas u dhawaa wuxuuna gacanta ku hurinaaye dab, waxaan kornay geedkii waxaana geedka korkiisa ku yaalay daar aad iyo aad u qurux badan daar lamida waligeey ma arkin, daartaas dhaxdeeda

waxaa joogeen niman duqooy ah iyo dhalinyaro iyo caruur iyo haween, kadibna way iga soo saareen wayna isoo galiyeen daar kale ayaan galnay oo kasii qurux badan tii hore, waxaana ku jiray daartaas duqooy iyo dhalinyaro, kadibna waxaan ku iri labadii nin: caawa oo dhan waad iso wareejiseen, ee ii sheega waxa aan soo arkay, labadii nin waxay i yiraahdeen: haa hada ayaan kuu sheegeyna,

- **BEENTA BADAN**

Beenloowga waa Munaafaqa sidaan baa loo cadaaba

Midkii 1aad aad arkeysay ee daanka laga jeexaaye wuxuu ahaay beenaale dadka ayuu been u sheegi jiray beentiisana bulshada ayay wada gaari jirtay waana sidaas cadaabkiisa ilaa maalinta qiyaame,

- **TAARUK SALAADKA**

Taaruk salaadka waa Gaal sidaan ayaana loo cadaaba

Midkii 2aad ee aad arkeysay oo madaxa dhagaxa loogu dhufanaaye wuxuu ahaay nin bartay Qur'anka habeenkii wuu ka hurdi jiray maalintiina kuma dhaqmi jirin, shanta salaadood waa uu ka seexan jiray ,sidaas ayuu cadaabkiisa ahaana ilaa maalinta qiyaame,

- **Zinada**

Zaaniga kuwa galmada xaaranta ah sameeya sidaan loo cadaaba

Kuwii 3aad ee godka tinaarka oo kale ku jiray waa haweenkii iyo ragii aduunyada ku zineesan jiray,

▪ RIBADA

Kuwa ribada cuno sidaan ayaa loo cadaaba

Midkii 4aad aad arkeysay ee wabiga dhax taagnaa waa mid ribada cuni jiray,

Odaygii geedka hoostiisa joogay waa Nabi Ibrahim Cs, caruurtii agagaarkiisa joogtayna waa caruurtii ay dhaleen dadka aduunka joogay, ninkii kale ee dabka hurinaayay waa Maalik CS malaga naarta Jahanamo furaheeda haayo,

Daartii kowaad waa daarta guud ahaan dadka Mu'miniinta ay ku noolan doonan nolosha Barzaqa,

Daartaan labaadna waa daartii dadkii shuhadada ahaay,

Labadeenan nin hadaad isku kaa sheegno, aniga waxaan ahay Malakul Jibriil, midkaana waa Mikaa'il, Nabiga ﷺ wuxuu yiri: madaxeyga ayaan kor u qaaday waxaan arkay daruur, dhaxdeeda waxaa kamuuqday daar, labadii malag waxay i yiraahdeen: taasina waa daartaada, waxaa ku iri: idaaya aan gale daarteyda, waxayna i dhaheen: cimri ayaa ku haray soo dhameyso cimrigaada kadib ayaad soo galeysaa gurigada.

Saxiix Al-Bukhaari 1386, waa saxiix.

Hadaba 4 qeybood oo cadaab ah ayaan kusoo sheegnay xadiithka nambarkiisu yahay 1386 ee ku qoran kitaabul Janaa'iz.

Kuwa 5aad waa Gaalka iyo Munaafaqa waa isku cadaab.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

العَبْدُ إذا وُضِعَ في قَبْرِهِ، وتُوُلِّيَ وذَهَبَ أصْحابُهُ حتّى إنَّه لَيَسْمَعُ قَرْعَ نِعالِهِمْ، أتاهُ مَلَكانِ، فأقْعَداهُ، فَيَقُولانِ له: ما كُنْتَ تَقُولُ في هذا الرَّجُلِ مُحَمَّدٍ ﷺ؟ فيَقولُ: أشْهَدُ أنَّه عبدُ اللَّهِ ورَسولُهُ، فيُقالُ: انْظُرْ إلى مَقْعَدِكَ مِنَ النّارِ أبْدَلَكَ اللَّهُ به مَقْعَدًا مِنَ الجَنَّةِ، قالَ النبيُّ ﷺ: فَيَراهُما جَمِيعًا، وأَمّا الكافِرُ - أوِ المُنافِقُ - فيَقولُ: لا أدْرِي، كُنْتُ أقُولُ ما يقولُ النّاسُ، فيُقالُ: لا دَرَيْتَ ولا تَلَيْتَ، ثُمَّ يُضْرَبُ بِمِطْرَقَةٍ مِن حَدِيدٍ ضَرْبَةً بيْنَ أُذُنَيْهِ، فَيَصِيحُ صَيْحَةً يَسْمَعُها مَن يَلِيهِ إلّا الثَّقَلَيْنِ.

أخرجه البخاري (١٣٣٨)،

ومسلم (٢٨٧٠)

[صحيح]

Adoonka markii la dhigo qabrigiisa oo ay kasoo noqdaan asxaabtiisi ehelkiisa ilaa uu ka maqlo shanqarta gabahooda ayaga oo sii socdaan, labo malag ayaa u imaanaayaan, way soo fadhiisinaayan, waxayna dhahaayaan: maxaad ninkaan ka leedihiin ee la yiraahdo Muxammed ﷺ? Wuxuun leeyahay Mu'minka: waxaan qiraaya inuu adoonkii Alle yahay iyo Rasuulkiisa ﷺ, waxay dhahaayaan labadii malag: fiiri booskii aad naarta ku lahayd Ilaahey ﷻ ayaa kugu badalay booskaas aad Jannada ku leedahay, Nabiga ﷺ wuxuu yiri: wuu arka boosaskii uu Jannada iyo Naarta uu ku lahaay dhamaantood, lakiin Gaalka iyo Munaafaqa markii Su'aal laga waydiiyo Rasuulkii Alle ﷺ waxay dhahaayaan: ma naqaano, kaliya waxaan dhihi jiray waxa ay dadka dhahaayaan, kadibna malaa'igtii waxay leeyihiin: wax aad garatay iyo wax aad aqrisay midna ma jiraan, kadibna burus naar ah ayaa madaxa loogaga dhufanaa wuxuuna qeylina qeylo ay xeywaanada aduunyada joogo oo dhan ay maqlaayaan marka laga reebo labada nooc ee basharka kamida oo kala ah Insi iyo Jinni.

- Xadiithkaan hadaan waxyar fasiraad ka bixino, qofka markii la duugo oo uu qofka ugu dambeeyo kasii dhaqaaqayo qajaftiisa maqlo, ogow qofka markaas waxaa jirkiisii ku haray dareenka maqalka oo xariir toos ah la leh dareemihii kale ee ruuxda la baxay kuwaaso ku sugan calaamka barzaqa, isla markiiba waxaa midoobaayo oo isku imaanayo ruuxdii oo dareemaha intoodii badneed ay la baxeen iyo dareenkii kale ee ku haray jirkii ku duugnaa caalamka aduunyadaan kadibna waxaana il biriqsi dhameen ayay ku midoobaayan kadib qofkii wuxuu kasoo toosa caalamka barzaqa, asagoo u maleynaayo inuu qabriga ku jiro, waayo caalamkaas barzaqa waa caalam ka kooban dhul iyo cir bado iyo buuro, Gaalka iyo Munaafaqa waxay caalamkaas kasoo toosaayan ayagoo mugdi ku jiro waxayna moodayaan iney qabriga ku jiraan, lakiin Muslimka wuxuu soo kacaaya asagoo moodaayo wali inuu dunidii joogo, Jawiga caalamkaasna wuxuu la noqonaaya waqti galab gaabad camal. Marka waa inaan kala fahamnaa farqiga u dhaxeeyo godka jirkaada lagu duugay iyo caalamka barzaqa ineysan wax shaqo ah isku lahayn.

Waxaa soo saaray Al-Bukhaari 1338, Muslim 2870, xadiithkaan waa saxiix.

▪ KIBIRKA IYO ISLA WEYDINA

Kan 6 aad, Kibirka iyo isla weynida

Kibirka iyo isla weynida waa waxa keena in xaqa la diido dadkana la yaso sida uu sheegay Rasuulkeena Muxammed ﷺ wuxuu yiri:

الكِبرُ بَطَرُ الحقِّ وغَمْطُ النّاسِ".

أخرجه مسلم (٩١)

صحيح

Kibirka waa in xaqa la diido dadkana la liido

Waxaa soo saaray Muslim 91, xadiithka waa saxiix.

Hadaba ciqaabta qofka kibirka badan ee cadaabka barzaqa waa sidee?

Sida laga waryay Nabigeena ﷺ wuxuu sheegay in dhulka lala jaraayo oo uu todobada dhul usii hoobanaayo ilaa maalinka qiyaame laga gaarayo waana kanaa xadiithka lagu sheegay cadaabkaas:

- **MARADA OO DHAAFRTO QOOBABKA LUGAHA**

Kan 7aad, marada oo dhaafto qoobabka lugaha.

بينا رجلٌ يَجُرُّ إزارَه مِن الخُيَلاءِ خُسِفَ به، فهو يَتَجَلْجَلُ في الأرضِ إلى يومِ القيامةِ.

صحيح النسائي ٥٣٤١

أخرجه البخاري (٣٤٨٥)

صحيح

Markii uu qofka kibir iyo isla weyni uu arlada isku qaad qaadi jiray dhinto, nolosha barzaqa uu tago, dhulka lala jaraaya, wuuna sii dildilooma ilaa maalinta qiyaame.

Saxiix An-Nisaa'i 5341, waxaa kaloo soo saaray Al-Bukhaari 3485.

Xadiithka waa saxiix.

▪ XEYWAANKA IN LA XABISO OO LA CADAABO ILAA UU KA DHINTO

Kan 8aad xeywaanka in la xabiso oo la cadaabo ilaa uuka dhinto.

وَعُرِضَتْ عَلَيَّ النّارُ، فَرَأَيْتُ فِيها امْرَأَةً مِن بَنِي إسْرائِيلَ تُعَذَّبُ في هِرَّةٍ لَها، رَبَطَتْها فَلَمْ تُطْعِمْها، وَلَمْ تَدَعْها تَأْكُلُ مِن خَشاشِ الأرْضِ

صحيح مسلم ٩٠٤

صحيح

Rasuulkii Alle ﷺ Wuxuu yiri: waxaa leyso bandhigay naarta, waxaan ku arkay haweeney heer Banii Israel ah oo cadaabtay bisad ay lahayd, way xabistay, cuno iyo cabitaana way ka jartay markii dambana ay baahi u dhimatay. Saxiixu Muslim 904, Xadiithka waa saxiix. Xadiithkaan waa xadiithka kusuufka.

Xeywaanada in la cadibo waa asbaabaha lagu muteesto in cadaabka barzaqa qofka uu naar ku gubto, maxaad u maleyneesa dadka dadka kale cadaabayo habeen iyo maalin oo xabsiyada u sameystay.

▪ DEENTA

Kan 9aad, waa Deenta.

عن جابر بن عبدالله قال : تُوفِّيَ رَجلٌ فغسَّلْناه، وحنَّطْناه، وكفَّنّاه، ثُم أتَيْنا به رسولَ اللهِ ﷺ يُصلِّي عليه، فقُلْنا: تُصلِّي عليه؟ فخطا خُطًى، ثُم قال: أعليه دَينٌ؟ قُلْنا: ديناران، فانصَرَفَ، فتحمَّلَها أبو قَتادةَ، فأتَيْناه، فقال أبو قَتادةَ: الديناران عليَّ، فقال رسولُ اللهِ ﷺ: حقُّ الغَريمِ، وبرِئَ منها المَيِّتُ؟ قال: نَعم، فصلّى عليه، ثُم قال بعد ذلك بيومٍ: ما فعَلَ الديناران؟ فقال: إنَّما ماتَ

أمسِ، قال: فعادَ إليه منَ الغَدِ، فقال: لقد قضَيْتُهما، فقال رسولُ اللهِ ﷺ: الآن بَرَدَتْ عليه جِلدُه، وقال مُعاويةُ بنُ عَمرٍو في هذا الحديثِ: فغسَّلْناه، وقال: فقُلْنا: تُصلِّي عليه.

إسناده حسن
أخرجه أحمد (١٤٥٣٦)

Jaabir Bin Cabdillaah wuxuu yiri: nin ayaa dhintay waan dhaqnay, xanuudhkii baan marinay, waana kafanay, kadibna Rasuulkii Alle ﷺ ayaan ula nimid, si uu ugu dukado, waxaana dhahnay: Managula dukaneysaa? Kadibna wuxuu isku diyaariyay inuu nagula dukto, kadibna wuxuu na weydiiyay: ma deen ayaa lagu leeyahay? Waxaana ku dhahnay: haa waliba laba dinaar, kadibna Rasuulkii Alle ﷺ safkii salaada wuuka baxay kadibna wuxuu weydiiyay deenta, Abuu Qataada wuxuu yiri: aniga ayay dusheeda tahay, Rasuulkii Alle ﷺ adiga ayay dushada xaq ku tahay inaa deentaas bixisid meydkana bari ayuu ka yahay ee ma ogoshahay? Kadibna wuxuu yiri: haa waa ogolahay, Kadibna Rasuulkii Alle ﷺ wuu ku duktay, kadibna Abuu Qataada wuxuu yiri: maalin kadib ma bixiyaa labadii diinaar? Rasuulkii Alle ﷺ Wuxuuna ku jawaabay: shalay ayuu geeriyooday, kadib Abuu Qataada wuxuu kusoo laabtay maalintii xigtay wuxuuna yiri: waan guday deentii Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: hada ayuu jirkiisii qaboobay.

Isnaadkiisa waa saxiix, waxaa soo saaray Axmed 14536.

- **QANIISNIMADA**

Kan 10aad, Qaniisnimada:

Qaniisnimada waxay kamid tahay waxyaabaha cadaabka qabriga lagu muteesto qofka asagoo rag ah u tago rag kale waa jaahil nolosha barsaqana cadaab daran ayuu la kulmaa ama tinaar halagu cadaabo sida ragii iyo haweenkii iska zineestay oo kale ama qaab kale haloo cadaabe koley cadaabka kama nasanaayo ilaa maalinta qiyaame.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿أَئِنَّكُمْ لَتَأْتُونَ الرِّجَالَ شَهْوَةً مِّن دُونِ النِّسَاءِ ۚ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ تَجْهَلُونَ ﴿٥٥﴾﴾

(An-Naml - 55)

Idinku ma Raggaad u Tagaysaan Doonid darteed Haweenka ka sokow, waxaadse Tihiin Qoom Jaahiliina.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

من وجدتموه يعملُ عملَ قومِ لوطٍ فاقتلوا الفاعلَ والمفعولَ به
أخرجه أبو داود (٤٤٦٢)،
والترمذي (١٤٥٦)،
وابن ماجه (٢٥٦١)،
وأحمد (٢٧٣٢)

حسن صحيح

Cidii aad heshaan ayagoo sameynaayo camalkii qoomu luud qaniisnimo dila ka sameynaaye iyl kan lagu sameynaayay.

Waxaa soo saaray Abuu Daawuud 4462

At- Tirmidi 1456

Ibnu Maajah 2561

Axmed 2732

Xadiithka waa mid wanaagsan saxna ah

Xukunka qaniisnimada

Qaniiska asagoo falal qaniisnimo ah ku jiro haddii gacanta lagu dhigo ciqaabtiisa waa sidaan:

Waa in dabaq ama meel aad dhulka ugaga fog la saara kadibna laga soo tuuraa.

وقال ابن عباس – رضي الله عنهما –:

إن اللوطي إذا مات من غير توبة فإنه يمسخ في قبره خنزير.

Ibnu Cabaas wuxuu yiri: qofka qaniiska ah haddii uu dhinto asagoo anan towbad keenin nolosha barzaqa waxaa loo badalaa doonfaar.

- Qofka falkaan xun ee qaniisnimada ah caadeystay noloshaan aduunyada wuxuu ku noolaana nolol najaas ah oo tan musqusha camal ah ileen meel uu xaar kasoo baxaayo ayuu caadeystay inuu ku noolaado, marka Allah ﷻ waa caadil isla noloshaan aduunyada nolol u eg ayuu barzaqana ku nooleena wuxuuna u badalaa doonfaar. Doonfaarka ula jeedada loo abuuray waa inuu arlada ka nadiifiya qurunka iyo najaasta xitaa

xaarka wuu cunaa, marka qofka qaniiska ahna waa saas waa qurun ku nool.

- **MARKII UU QOFKA DHINTO IN LOO OOYO.**

Kan 11aad, Markii uu qof dhinto in loo ooyo.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

إنَّ المَيِّتَ ليُعَذَّبُ ببكاءِ أهلِهِ عليهِ

صحيح الجامع ١٩٧٠

أخرجه البخاري ١٢٨٦

ومسلم ٩٢٨

صحيح

Meydka waxaa lagu cadaaba oohinta ay ehelkiisa u ooynayaan.

Saxiix Al-Jaamic 1970

Waxaa soo saaray Al-Bukhaari 1286

Muslim 928

Xadiithka waa saxiix

Sida ka muuqato xadiithka qofka dhintay waxaa lagu cadaaba qabrigiisa, iyo dunuubtii uu galay uusan ka towbad keenin, isla waqtigaas la cadaabayo waxaa u oynaayaan ehelkiisa ayagoo ku hadlaayo hadalo u badan hoog iyo Ba' taaso aanan diin ahaan banaaneyn.

▪ TUUGANIMADA

Kan 12aad, **Tuuganimada.**

Tuuganimada waa shay xaaran ah Alle ﷻ uu necebyahay wuxuuna amray ciddii tuugnimo lagu ogaado in shareecada islamka la mariyo gacantana laga jaro.

﴿وَالسَّارِقُ وَالسَّارِقَةُ فَاقْطَعُوا أَيْدِيَهُمَا جَزَاءً بِمَا كَسَبَا نَكَالًا مِّنَ اللَّهِ ۗ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٣٨﴾﴾

(Al-Maidah - 38)
Tuugga iyo Tuugadda Gooya Gaemahooda Abaalmarin waxay kasbadeen Darteed waana Xanuujin Eebe ILaahayna waa adkaade Falsan.[1]

Tuuga ama Tuugada, waa in gacanta laga jaraa waayo waa sharci ay diinteena Islamka soo dajisay, diinteena waxay dhowrtaa xuquuqda dadka masaakiinta ah si aanan loo qaadanin maalkooda, si aanan loogaga xaq darnaanin, marka Tuuga hadii gacanta laga jari waayo Maalin walbo wuxuu kuso talo galaa inuu wax sharci darro ku qaato iyo inuu xaaran cuno.

عن أبي هريرة أن رسول الله - صلى الله عليه وسلم - قال: لَعَنَ اللَّهُ السّارِقَ، يَسْرِقُ البَيْضَةَ فَتُقْطَعُ يَدُهُ، وَيَسْرِقُ الحَبْلَ فَتُقْطَعُ يَدُهُ.

[1] Surat Al-Maidah ayah 38

[صحيح] صحيح البخاري ٦٧٩٩[2]

Abii Hureyra wuxuu ka waryay Rasuulkii Ilaahey ﷺ inuu yiri:"Allaha lacnado tuuga xado ukunta lagana jaro gacanta iyo midka xariga xado gacanta laga jaro."

فَمَنْ تَابَ مِنْ بَعْدِ ظُلْمِهِ وَأَصْلَحَ فَإِنَّ اللَّهَ يَتُوبُ عَلَيْهِ ۗ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَحِيمٌ[3]

Ciddiise Toobad keenta Dulmigiisa ka Dib oo Fiicnaada ILaahay wuu ka Toobad Aqbali, Eebana waa Dambi Dhaafe naxariista.

عن عبد الله بن عمرو قال: سرقت امرأة حليا فجاء الذين سرقتهم فقالوا: يا رسول الله سرقتنا هذه المرأة فقال رسول الله - صلى الله عليه وسلم- اقطعوا يدها اليمنى فقالت: المرأة هل من توبة فقال رسول الله - صلى الله عليه وسلم- أنت اليوم من خطيئتك كيوم ولدتك أمك

Cabdulaahi Bin Cumar wuxuu yiri:" waxaa wax xaday Haweeneydii Xalya waxaana yimid midkii waxa laga xaday wuxuu yiri:"Rasuulkii Ilaahow ﷺ haweeneydaan wayna xaday Rasuulkii Ilaahey ﷺ wuxuu yiri:"gacanta midig ka jara waxay tiri:"towbad ma leeyahay wuxuuna yiri Rasuulka ﷺ maanta waxa dambiga ka tahay sidii ay hooyada kugu dhashayo kale".

[2] [2] Waxaa waryay Bukhaari 6799 Waa saxiix

[3] Surat Al-Ma'idah, Ayah 39.

Cadaabka qabriga ee tuuga waa sidee?

Maalin maalmaha kamid ah ayaa asxaabtii qaar kamid ah iyo Rasuulka ﷺ waxay kasoo laabteen dagaalkii qeybar, qaar asxaabtii kamid ah ganiimo maysan helin lakiin laba nin oo asxaabtaas kamid ah ayaa midna wuxuu helay xermo dhar ah midna labo iskaalso ah, kadibna ninkii xermada dharka ah helay ayaa waxaa ku dhacay waran wiifto ahaa oo meel uu ka yimid la aqoonin, kadibna asxaabtii qaar kamid waxay dhaheen nasiib badanaa Janna u waajibtay, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

والذي نَفْسِي بيَدِهِ، إنَّ الشَّمْلَةَ الَّتي أصَابَهَا يَومَ خَيْبَرَ مِنَ المَغَانِمِ لَمْ تُصِبْهَا المَقَاسِمُ، لَتَشْتَعِلُ عليه نَارًا. فَجَاءَ رَجُلٌ حِينَ سَمِعَ ذلكَ مِنَ النَّبيِّ صلَّى اللهُ عليه وسلَّمَ بشِرَاكٍ -أوْ بشِرَاكَيْنِ- فَقَالَ: هذا شَيءٌ كُنْتُ أصَبْتُهُ، فَقَالَ رَسولُ اللَّهِ صلَّى اللهُ عليه وسلَّمَ: شِرَاكٌ -أوْ شِرَاكَانِ- مِن نَارٍ.

Allaha nafsadeeda ay gacantiisa ku jirtaa ku dhaartaye xermadii dharka ahayd oo uu qaatay maalintii dagaalka qeybar oo ganiimada kamid ahayd taaso aanan loo qeybinin asxaabtii ayaa naar ku hurinoosa, ninkii kale ee asagana iskaalsada qaatay baa arintii maqlay Nabiga ﷺ oo sidaasi leh, kadibna ninkii ayaa yiri: ana waxaan qaatay iskaalsooyinkaan, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: iskaalsooyinka xitaa naarta lagu galaa.

Saxaabi ayaa lagu cadaabay kaliya xermo dhar ah oo uu ka helay goobtii dagaalka ayadoo uusan Rasuulkii Alle ﷺ uusan qeybinin ganiimada bal kawaran hanti dad masaakiin ah markii si bareer cad loo dhaco hadana loo maleeyo inaanan cadaab Alle lagu muteysan doonin? Runtii xaalku ma sahlana.

- **KAADIDA OO LEYSKA DHAQI WAAYO NAJAASTEEDA**

Rasuulkii Alle ﷺ ayaa maalin wuxuu soomaray qabuuro dhowr ah, kadibna saxaabadii ayuu weydiiyay wuxuu yiri: yaa yaqaano qabuurahaan cida ku duugan?

Saxaabadii ayaa waxay yiraahdeen ayagoo gaalo ah ayay dhinteen waqtigii jaahiliyada.

Markaas ayaa wuxuu yiri:

إنّهُما لَيُعذَّبانِ، و ما يُعذَّبانِ في كَبيرٍ، أمّا أحدُهما فكانَ لا يستَنزِهُ مِنَ البَولِ، و أمّا الآخَرُ فكان يَمشي بالنَّميمةِ.

صحيح الجامع ٢٤٤٠

صحيح

Dadkaan waala cadaabooya, waxa loo cadaabooyana wax weyn ma ahayn, (intey aduunka joogeen waa wax ay ka towbadkeeni kareen),

Midkood kaadida iskama dhaqi jirin, kan kalena wuxuu ahaa Namiim.

Saxiix Al-Jaamic 2440.

Saxiix.

- **NAMIIMNIMADA: DADKA IN LEYSKU DIRO**

Kacab Bin Maalik Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri:

اتَّقُوا النَّمِيمَةَ فَإِنَّ صَاحِبَهَا لَا يَسْتَرِيحُ مِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ

Ka cabsada namiimnimada, maxaa yeelay qofka namiimka ah kama nasto cadaabka qabriga.

Kitaabka Ibnu Abii Dunyaa.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

إنّهُما لَيُعذَّبانِ، و ما يُعذَّبانِ في كَبيرٍ، أمّا أحدُهما فكانَ لا يستَنزِهُ مِنَ البَولِ، و أمّا الآخَرُ فكان يَمشي بالنَّميمةِ.

صحيح الجامع ٢٤٤٠

صحيح

Dadkaan waala cadaabooya, waxa loo cadaabooyana wax weyn ma ahayn, (intey aduunka joogeen waa wax ay ka towbadkeeni kareen),

Midkood kaadida iskama dhaqi jirin, kan kalena wuxuu ahaa Namiim.

Saxiix Al-Jaamic 2440.

Saxiix.

- **XANTA**

Xanta waa waxa ugu daran oo aanan soon iyo salaad midna lagu cafineenin.

Qof bani'aadam ah inaad xamatid ma ahan wax fudud xanta waa astaantama lagu yaqaano munaafiqiinta iyo dadka diin ahaan liito.

Allah ﷻ wuxuu yiri:

﴿وَيْلٌ لِّكُلِّ هُمَزَةٍ لُّمَزَةٍ ۝١﴾

(Al-Humaza - 1)

Halaag Wuxuu u Sugnaaday xanle wax ceebeya oo Dhan.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

الغِيبةُ ذِكرك أخاك بما يكره.

صحيح الجامع ٤١٨٧

أخرجه مسلم ٢٥٨٩

وأبو داود ٤٨٧٤

والترمذي ١٩٣٤

صحيح

Xanta waa ku sheegida walaalkada wax uu kiraahsanaayo.

Saxiix Al-Jaamic 4187

Waxaa soo saaray Muslim 2589

Abuu Daawuud 4874

Tirmidi 1934

Waa saxiix.

Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri:

إنّهُما لَيُعذَّبانِ، و ما يُعذَّبانِ في كبيرٍ، أمّا أحدُهما فيُعذَّبُ في البَولِ، و أمّا الآخَرُ فيُعذَّبُ في الغِيبَةِ.

صحيح الجامع ٢٤٤١

صحيح

Dadkaan waala cadaabooya, waxa loo cadaabooyana wax weyn ma ahayn, (intey aduunka joogeen waa wax ay ka towbadkeeni kareen),

Midkood kaadida iskama dhaqi jirin, kan kalena waxaa loo cadaabayaa xanta uu dadka xaman jiray.

Saxiix Al-Jaamic 2441.

Saxiix.

Rasuulkeena ﷺ wuxuu yiri:

بَيْنا أنا نائمٌ إذ أتاني رجُلانِ فأخَذا بضَبْعَيَّ فأتَيا بي جَبلًا وعْرًا فقالا لي: اصعَدْ حتّى إذا كُنْتُ في سواءِ الجبلِ فإذا أنا بصوتٍ شديدٍ فقُلْتُ: ما هذه الأصواتُ؟ قال: هذا عُواءُ أهلِ النّارِ ثمَّ انطلَق بي فإذا أنا بقومٍ مُعلَّقينَ بعراقيبِهم مُشقَّقةٍ أشداقُهم تسيلُ أشداقُهم دَمًا فقُلْتُ: مَن هؤلاءِ؟ فقيل: هؤلاءِ الَّذينَ يُفطِرونَ قبْلَ تحِلَّةِ صومِهم ثمَّ انطلَق بي فإذا بقومٍ أشدِّ شيءٍ انتفاخًا وأنتَنِه ريحًا وأسوَئِه منظَرًا فقُلْتُ: مَن هؤلاءِ؟ قيل: الزّانونَ والزَّواني ثمَّ انطلَق بي فإذا بنساءٍ تنهَشُ ثُدِيَّهنَّ الحيّاتُ قُلْتُ: ما بالُ هؤلاءِ؟ قيل: هؤلاءِ اللّاتي يمنَعْنَ أولادَهنَّ ألبانَهنَّ ثمَّ انطلَق بي فإذا أنا بغِلمانٍ يلعَبونَ بَيْنَ نَهرينِ فقُلْتُ: مَن هؤلاءِ؟ فقيل: هؤلاءِ ذَراريُّ المُؤمِنينَ ثمَّ شرَف بي شرَفًا فإذا أنا بثلاثةٍ يشرَبونَ مِن خَمرٍ لهم فقُلْتُ: مَن هؤلاءِ؟ قالوا: هذا إبراهيمُ وموسى وعيسى وهم ينتظِرونَكَ.

تخريج صحيح ابن حبان ٧٤٩١
إسناده صحيح

Mar aan hurdaayay waxaa ii yimaadeen laba nin waxayna qabteen labadeeda garbood, waxayna i keenen buur aad u dheer, waxayna i dhaheen: fuul buurtaan, waxay igu caawiyeen inaan buurta fuulo dhaxdeeda tago, waxaana maqlay codad aad u daran qeyladooda, waxaana ku iri: waa maxay codadkaan? Codadkaan waa codadka ahlu Naarka, kadibna waxaan u galnay qoom lasoo laadlaadiyay oo lugahooda si kor ah loo xiray, wajigoodana uu hoos jiro, dhabankoodana uu dilaacayo kadibna dhiig uu ka qulqulaayo, waxaan ku iri: waa maxay kuwaani? Waxayna i dhaheen waa kuwii ayadoo soom ay tahay afuri jiray ayadoo waqtiga afurka la gaarin, Kadibna waan u tagnay qoom jirkoodu bararsan yahay, aadna usoo uraayan, aragoodana aad u xunyahay, waxaan iri: waa maxay kuwaani? Waxayna

i dhaheen: waa Ragii iyo Haweenkii aduunka ku zineysan jiray, kadibna waan ka tagnay waxaana u tagnay Haween ay abeesooyin naasaha ka cunaayan suntoodana jirkooda lagu cadaabayo, waxaana ku iri: kuwaana iiga waran? Wacxayna i dhaheen: kuwaan waa Haweenkii caruurtooda u diidi jiray iney nuujiyaan naasahooda oo caano ka buuxan, kadibna waa ka tagtay waxaana u tagnay caruur laba wabi dhaxdooda ku dheelaayan, kadibna waxaan ku iri: kuwaan yaawaaye? Waxayna i dhaheen: waa caruurtii muslimiinta aduunka joogo ay dhaleen, kadibna saro ayay isii qaadeen labadii nin, kadibna waxaan la kulmay sadax qamro cabaayaan, kadibna waxaan ku iri: kuwaan yaawaaye? Waxayna i dhaheen: Waa Nabi Ibrahim CS, Nabi Muse CS, iyo Nabi Ciise CS wayn ku sugooyaan inaad u imaadid markaad dunida kasoo tagtid.

Waxaa soo saaray Saxiix Ibnu Xibaan 7491

Isnaadkiisu waa saxiix.

Hadaba xadiithkaan qiimaha badan wuxuu tilmaamay dad lagu cadaabayo buuro dhaxdooda dadkaasi waxaa kamid ahaa kuwa aan ku sheegi doono:

- MAALIN AYADOO AY RAMADAAN TAHAY IN KAS LOO AFURO AMA MACAASI KALE LA SAMEEYO

Dadka bisha ramadaan si kas ah u afuro, waxaa lagu cadaaba buur dhaxeeda waxaana laga soo laadlaadina meel ayadoo cankooda uu dilaacayo dhiiguna saas uu ugaga qubanaayo.

- HAWEENEYDA OO CANUGEEDA NUUJIN DIIDO AYADOON DHIB JIRIN

Haweenka qaarkood caruurtooda ayay nuujinta u diidaan ayagoo ku xumeynaayo ninkooda ama familkii uu ka dhashay ama isfaham waa dhaxmaray darteed, taasina ma banaana waa xaarnan cadaabka qabriga lagu cadaabayana waa abeeso iney naasaha ka cunaan kadibna xanuunka sunta abeesada qaniintayna lagu cadaabo.

Nolosha barzaqa waa nolol nimco iyo cadaab intaba ay taalo waa nolol risqi ay ku helaayaan dadkii wanaagsan, Ambiyada Ilaahey iyo Caruurtii yaryaraa ee dhimatay, sida aad xadiithka ka arki kartid, nolosha taalo caalamka barzaqa waa nolol xaqiiqo ah waa nolol ka kooban ruux iyo jismi. Taasi waxaa cadeen kugu filan qofka markii uu su'aalaha qabriga uu ka jawaabo waxaa loo keena firaash uu ku seexdo iyo dhar aad u qurux badan. Hadaba aqristoow su'aal aan ku weydiiye ruux aanan jismi lahayn miyaa dhar iyo firaash loo keeni lahaa? Jawaabta waa xagaada.

Su'aal kale: ruux aanan jismi lahayn miyuu dhiig ka daadan lahaa? Jawaabta waa xagaada.

Sidoo kale caalamka barzaqa waa caalam labo qeybood ka kooban, qeeb waa barwaaqo iyo nolol aanan hore bani aadamka manta dunida nool aysan arag xitaa qalbigooda kusoo dhicin, qeebna waa cadaab daran oo qof bani aadam maanta dunidaan ku nool uusan suureysan karin, waa caalam kasii weyn balaayiin jeer caalamkaan aan ku noolnahay.

Qeebta cadaabka daran uu kajiro waxay ka kooban tahay:

- Dhul siman
- Dhismooyin sida tinaarkii uu kale ah
- Wabiyaal dhiig ah oo kasii waaweyn badaheena aduunyada
- Buuro aad u dhaadheer

Qeebta barwaaqada iyo raaxada ay taalo wa ay ka kooban tahay:

- Dhul doog ah aadna u weyn
- Geed aad u weyn oo jiridiisa iyo caleemahiisa yihiin qaarado waaweyn kuwaaso ay kuyaalaan bado iyo wabiyaal qusuur aad u dhaadheer oo kala qurxoon kuwaaso kala sareeyo

Ogow caalamka barzaqa wuxuu farxad u yahay dadka Alle ﷻ ka cabsaday wuxuuna cabsi iyo musiibo u yahay dadka gaalada ah iyo munaafiqiinta iyo muslimiinta Alle ﷻ caasisay.

Hadaba waxaa muhiim ah in aad fahamtid qodobo dhowr ah kuwaaso iimaankada qor u qaadi doono kuna sahli doono inaad guud ahaan iska daaysid dunuubta iyo macaasida.

1. Noloshaan aduunyada ma ahan mid xaqiiqo ah waa dhalanteeda iyo waxaanan jirin.
2. Ulajeedada laguu abuuray waa inaad iska diyaarisaa sadaxda su'aalood ee qabriga.
3. Nolosha saxda ah waa tan Qur'anka iyo Alle ka cabsiga ee ma ahan mida xoolaha xaaranta ah la raadiyo ama sharaf iyo halagaa sheego ama madaxnimo ama awood dhaqaale IWM.
4. Nolosha saxda ah waa inaad dhimashada u diyaarsanaata marwalbo iyo meel walbo aad joogtid.

- ZAKADA OO LA BIXIN WAAYO

Rasuulkeena ﷺ wuxuu yiri:

إنّ الميّتَ إذا وُضِع في قبرِه إنّه يسمَعُ خَفْقَ نعالِهم حينَ يولُّونَ عنه فإنْ كان مؤمنًا كانتِ الصَّلاةُ عندَ رأسِه وكان الصِّيامُ عن يمينِه وكانتِ الزَّكاةُ عن شِمالِه وكان فعلُ الخيراتِ مِن الصَّدقةِ والصِّلةِ والمعروفِ والإحسانِ إلى النّاسِ عندَ رِجْلَيْهِ فيؤتى مِن قِبَلِ رأسِه فتقولُ الصَّلاةُ: ما قِبَلي مدخلٌ ثمَّ يؤتى عن يمينِه فيقولُ الصِّيامُ: ما قِبَلي مدخلٌ ثمَّ يؤتى عن يسارِه فتقولُ الزَّكاةُ: ما قِبَلي مدخلٌ ثمَّ يؤتى مِن قِبَل رِجْليهِ فتقولُ فعلُ الخيراتِ مِن الصَّدقةِ والصِّلةِ والمعروفِ والإحسانِ إلى النّاسِ: ما قِبَلي مدخلٌ فيُقالُ له: اجلِسْ فيجلِسُ وقد مُثِّلَتْ له الشَّمسُ وقد أُدنِيَت للغروبِ فيُقالُ له: أرأَيْتَك هذا الرَّجلَ الَّذي كان فيكم ما تقولُ فيه وماذا تشهَدُ به عليه؟ فيقولُ: دعوني حتّى أُصلِّيَ فيقولونَ: إنّك ستفعَلُ أخبِرْني عمّا نسأَلُك عنه أرأَيْتَك هذا الرَّجلَ الَّذي كان فيكم ما تقولُ فيه وماذا تشهَدُ

عليه؟ قال: فيقولُ: مُحَمَّدٌ أشهَدُ أنّه رسولُ اللهِ وأنّه جاء بالحقِّ مِن عندِ اللهِ فيُقالُ له: على ذلك حَيِيتَ وعلى ذلك مِتَّ وعلى ذلك تُبعَثُ إنْ شاء اللهُ ثمَّ يُفتَحُ له بابٌ مِن أبوابِ الجنَّةِ فيُقالُ له: هذا مقعَدُك منها وما أعَدَّ اللهُ لك فيها فيزدادُ غِبطةً وسرورًا ثمَّ يُفتَحُ له بابٌ مِن أبوابِ النّارِ فيُقالُ له: هذا مقعَدُك منها وما أعَدَّ اللهُ لك فيها لو عصَيْتَه فيزدادُ غِبطةً وسرورًا ثمَّ يُفسَحُ له في قبرِه سبعونَ ذراعًا ويُنوَّرُ له فيه ويُعادُ الجسدُ لِما بدَأ منه فتُجعَلُ نسَمتُه في النَّسمِ الطَّيّبِ وهي طيرٌ يعلُقُ في شجرِ الجنَّةِ قال: فذلك قولُه تعالى: ﴿ يُثَبِّتُ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا بِالْقَوْلِ الثَّابِتِ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَفِي الْآخِرَةِ ۖ وَيُضِلُّ اللَّهُ الظَّالِمِينَ ۚ وَيَفْعَلُ اللَّهُ مَا يَشَاءُ ﴾ [إبراهيم: ٢٧] قال: وإنّ الكافرَ إذا أُتي مِن قِبَل رأسِه لم يوجَدْ شيءٌ ثمَّ أُتي عن يمينِه فلا يوجَدُ شيءٌ ثمَّ أُتي عن شِمالِه فلا يوجَدُ شيءٌ ثمَّ أُتي مِن قِبَلِ رِجْليهِ فلا يوجَدُ شيءٌ فيُقالُ له: اجلِسْ فيجلِسُ خائفًا مرعوبًا فيُقالُ له: أرأَيْتَك هذا الرَّجلَ الَّذي كان فيكم ماذا تقولُ فيه؟ وماذا تشهَدُ به عليه؟ فيقولُ: أيُّ رجُلٍ؟ فيُقالُ: الَّذي كان فيكم فلا يهتدي لاسمِه حتّى يُقالَ له: مُحَمَّدٌ فيقولُ: ما أدري سمِعْتُ النّاسَ قالوا قولًا فقُلْتُ كما قال النّاسُ فيُقالُ له: على ذلك حَيِيتَ وعلى ذلك مِتَّ وعلى ذلك تُبعَثُ إنْ شاء اللهُ ثمَّ يُفتَحُ له بابٌ مِن أبوابِ النّارِ فيُقالُ له: هذا مقعَدُك مِن النّارِ وما أعَدَّ اللهُ لك فيها فيزدادُ حسرةً وثُبورًا ثمَّ يُفتَحُ له بابٌ مِن أبوابِ الجنَّةِ فيُقالُ له: ذلك مقعَدُك مِن الجنَّةِ وما أعَدَّ اللهُ لك فيه لو أطَعْتَه فيزدادُ حسرةً وثُبورًا ثمَّ يُضيَّقُ عليه قبرُه حتّى تختلفَ فيه أضلاعُه فتلك المعيشةُ الضَّنْكةُ الَّتي قال اللهُ: ﴿فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنْكًا ونَحْشُرُهُ يَوْمَ القِيامَةِ أعْمى﴾ [طه: ١٢٤].

صحيح ابن حبان ٣١١٣ أخرجه في صحيحه

Markii meydka qabriga la dhigo, wuxuu maqlaaya shanqarta ugu dambeyso qofka kasii dhaqaayo, ilaa marka dambe ay kasoo tagaan, haddii uu ahaay qof mu'min ah Alle ﷻ rumeeyay, salaadii uu dukanjiray ayaa dhanka madaxiisa imaaneyso oo ilaalineyso, soonkiisana dhanka midig uu ka ilaalina, Zakadana dhanka bidix, sadaqadii, qaraabadii uu xariitin jiray wanaagi uu dadka fari jiray iyo axsaankii uu dadka u sameyn jirayna dhanka lugahiisa ayay maraayan oo ay ka ilaalinaayan,

marka ay malaa'igta dhanka madaxa ay kaso maraan salaadii ayaa dhaheyso: dhankeyga hasoo marina, hadane dhanka midig ayay kasoo maraayan soonkii ayaa wuxuu leeyahay: dhankeyga hasoo marina, kadibna dhanka bidix bay soo maraayan zakadii ayaa dhaheyso: dhankeyga hasoo marina, kadibna dhankaasi waxba kama helaayan, hadane dhanka lugaha ayay soo aadayaan, kadibna ficiladii qeerka ahaa uu sameyn jiray sida sadaqada, xariirta ehelka iyo wanaaga uu fari jiray, iyo axsaankii uu dadka u sameyn jiray ayaa waxay leeyihiin: waxaana la leeyahay: fadhiiso, wuu fadhiisana kadibna qoraxda oo casirka camal sii dhaceyso ayuu jawiga uu markaasi jooga noqonaaya kadibna qofkii meydka ahaa waxaa la leeyahay: Kawaran ninkaan ladin soo diray maxaa ka dhihi jirtay? Kadibna wuxuu leeyahay: idaaya aan duktee, kadibna waxay leeyihiin: waad sameyneesa, ee noo sheeg: ninkaan waxa aan kaa weydiinay, kawaran ninkaan ladinka soo dhax saaray maxaa ka dhihi jirtay? Kadibna wuxuu leeyahay: waa Muxammed ﷺ wuxuu noola yimid wax xaq ah waan rumeyna waana raacnay, malaa'igtii waxay leeyihiin: iimaan ayaad ku nooleyd imaan ayaadna ku dhimatay, waana lagugu soo saari doona insha Allah, kadibna waxaa loo furaaya albaab Jannada ah waxaana la tusaaya booskiisa uu Jannada ku lahaay wuuna farxaa si saaid ah, waxaana lagu leeyahay: kaasi waa booska Jannadaku lahayd waayo Alle ﷻ ayaa ku diyaariyay, kadibna booska uu Naarta ku lahaa ayaa loo furaaya, waxaana lagu leeyahay: kaasi waa booska Naarta ku lahayd hadaad Alle ﷻ caasin lahayd kadibna wuu farxaa farxad saaid ah badbaadadii uu ka badbaaday Naarta darteed, kadibna qabrigiisa loo waasicinaa todobaatan dhudhun, waana loo

nuurinaa, kadibna ruuxdiisa iyo nafsadiisa waxaa la dhaxgalina shimbir waxayna ku dhax noolaaneysaa Jannada ayadoo meesha ay rabtana wax ka cuneyso, sidaasi darteed Allah ﷻ wuxuu yiri:

(Ibrahim - 27)

wuxuu ku sugaa Eebe kuwa rumeeyey xaqa Erayga sugan (ashaadada iyo xaqa) Nolosha adduun iyo Aakhiraba wuuna lumiyaa daalimiinta wuxuuna falaa Eebe wuxuu doono, haddaba dhanka kale midkii gaalka ahaa markii qabriga la dhigo malaa'igta ay u yimaadan waxay kasoo maraan madaxa waxba ma arkaayan oo qeyr ah kadane dhanka dhanka midig saas camal dhanka bidix sidoo kale, kadibna dhanka lugaha ayay kasoo maraayan waxba ma arkaayan, kadibna waxay dhahaayan: fadhiiso wuu fadhiisana asagoo cabsanaayo argagaxsan, kadibna waxay dhahaayaan: kawaran ninkaan ladin soo diray maxaa ka dhihi jirtay? Wuxuu leeyahay ninkee waaye? Ilaa markii dambe ay u sheegan magaciisa Muxammed ﷺ, kadibna wuxuu leeyahay: dadkoo wax dhahaayan ayaan maqlay ana waan iska dhahay, sidaasi gaalnimada ah ayaad ku nooleyd oo aad ku dhimatay oo lagugu soo bixin doona, kadibna albaab Naarta ah ayaa loo furaa waxaana la leeyahay waa kaas booskada uu Alle ﷻ kuu diyaariyay kadibna wuu shalayna wuuna qoomameynaa, kadibna albaab Jannada ah loo furaaya waxaana lagu leeyahay: booska Jannada ku lahayd waa kasaa haddad Alle adeeci lahayd, kadibna wuu shalayna wuuna qoomameynaa, kadibna qabriga ayaa lagu cariirinaa, Alle ﷻ wuxuu yiri:

(Ta-ha - 124)

Waxaa u sugnaaday nolol cidhiidhi ah, waxaana soo kulminaynaa maalinta qiyaame isagoo arag La'.

Zakada bixinteeda in la diido waa musiibo iyo cadaab qabri iyo cariiri wada socdo, sida xadiithka ku xusana ciqaabta uu qofka maraayo waxaa ugu yar tan la tusaayo booskii uu Naarta ku lahaa ayadoo waliba ciqaab kale usii dheertahay oo ah murugo iyo shalaay joogto ah.

Sidoo kale caalamka barzaqa xaqiiqooyinkiisa waxaa kamid ah:

- Waa caalam qofka tago lagu qiimeynaayo cibaadadii uu sameyn jiray iyo sadaqadii uu baxsan jiray, lakiin gaalka iyo munaafaqa meeshas faqri iyo cadaab ayaa ku noolaanaayan.
- Caalamka barzaqa xurnimo ma taalo ee waa nolol cariiri ah, shalaay iyo murugo ka sameysan taasoo qofka ku noolaan doono boqolaal kun oo sanadood inta maalinta qiyaame laga gaaraayo.
- Caalamka barzaqa waa caalam jiro oo xaqiiqo ah wuxuuna noo jira kumanan sano waa caalam waqtigaan la joogo ay ka socdaan cadaab daran.
- Caalamka barzaqa iyo qubuuraha calamkeena ku yaalo wax xariir ah kama dhaxeeyaan hasa ahaate qabriga, lakiin qabriga caalamka oo jirka meydka ah lagu duugaayo waa tusaale wax nalagu fahamsiinaayo sidoo kalena waa naxariis Alle ﷻ noogu

naxariisanaayo si hadhow jirkii dhintay uusan cuduro noogu keenin.

- Caalamka barzaqa qof walbo waxaa u yaalo jir kale oo ruuxdiisa iyo nafsadiisa la galinaayo si uu halkaasi ugu noolaado marka jirka lasoo fadhiisinaayo kan godka caalamkaan lagu aasay ma ahan ee waa mid kale oo uu Alle ﷻ diyaarsaday si uu cadaab u mariyo munaafiqiinta iyo gaalada.
- Ogow Alle ﷻ wax walbo wuu awooda waana kan abuuray jirkeena naga soo saaray caloosha hooyadeen marka miyuusan awoodin jirkale oo uu ciqaab ugu talo galay inuu ku diyaarsado, iska jir dhagarta Alle ﷻ sinna loogama badbaado wayna daran tahay.
- Caalamka barzaqa iyo noloshaan aduunyada xariirka ka dhaxeeyo waa camalka hadba qofka wixii uu camal ka dhigto ayuu halkaasna la tagaa, hadaad camal fiicneed xaga nolol sara kunoolaaneysaa, hadaad camal xumeedna xagaas ciqaab daran baa kugu sugeyso.
- Caalamka barzaqa waxaa lasoo tusay Nabigeena Muxammed ﷺ wuuna kasoo laabtay waliba si caadi ah, taasina waxay xoojineysaa xaqiiqada jiritaanka caalamkaan layaabka badan.
- Ogow hadaad maanta garan weydo wixii cadaabkaas kaa badbaadin lahaay beri markaad halkaas tagtid shalaay waxba kuuma tari doonto, inta aad caafimaadka qabtid towbad keen amarada Alle ﷻ qaado, kana fogaaw wax walbo qasaaro ku keeni karo ama diintaada kaa leexin karo.

- Haddii maanta lagu dhihi lahaa isku diyaari xabsi aanan wax naxariis oolin ayaa lagu wadaa waxaa kun iyo kow jeer ka fikiri lahayd sidii aad kaga badbaadi lahayd xabsigaas oo aad u raadsan lahayd meel aad kaga baxsatid bal kawaran cadaab Alle ﷻ oo aanan sina loogaga baxsan karin misna xaqiiqo ah laguuna sii sheegay? Ka fikir bal aqligada dib ugu laabo Caalamkaan siduu kula muuqda? Inta qof ee aad taqaanay maanta xaalad nooce ah bay ku jiraan? Xaga maku arki doonta kuwii aad dambiyada wada sameen jirteen? Walaal goorme ayaad towbad keeni doonta? Salaada goorme ayaad bilaabi doonta? Waqtiga uu Alle kusiiyay ma ahan bilaash ee hadaad ku dheeshid ciqaabteeda ku sugeyso, goorme is waanin doonta kana fogaan doonta wax walbo carada Alle ﷻ kugu keeni karo?

- DADKA IN WANAAGA LAFARO, QOFKA WANAAGA FARAAYANA UU NAFSADIISA ILAAWO.

Alle ﷻ wuxuu yiri:

﴿أَفَتُؤْمِنُونَ بِبَعْضِ الْكِتَابِ وَتَكْفُرُونَ بِبَعْضٍ ۚ فَمَا جَزَاءُ مَن يَفْعَلُ ذَٰلِكَ مِنكُمْ إِلَّا خِزْيٌ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا ۖ وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ يُرَدُّونَ إِلَىٰ أَشَدِّ الْعَذَابِ ۗ وَمَا اللَّهُ بِغَافِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٨٥﴾﴾

(Al-Baqara – 85)

Miyaad rumaynaysaan Kitaabtka qaarkiis, kana gaaloobaysaan qaar,

ruuxii saas fala oo idinka mid ah abaalkiisu ma aha dulli adduun iyo maalinta qiyaame oo loo celin cadaab daran mooyee, Eebana ma halmaamayo waxaad falaysaan.

﴿أُولَٰئِكَ الَّذِينَ اشْتَرَوُا الْحَيَاةَ الدُّنْيَا بِالْآخِرَةِ ۖ فَلَا يُخَفَّفُ عَنْهُمُ الْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٨٦﴾﴾

(Al-Baqara – 86)
kuwaasina waa kuwa ku gatay nolosha adduunyo (ee dhaw) aakhiro, lagamane fududeeyo xaggooda cadaabka loomana gargaaro.

Alle ﷻ wuxuu yiri:

﴿۞ أَتَأْمُرُونَ النَّاسَ بِالْبِرِّ وَتَنسَوْنَ أَنفُسَكُمْ وَأَنتُمْ تَتْلُونَ الْكِتَابَ ۚ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٤٤﴾﴾

(Al-Baqara – 44)
Wa waxaad faraysaan dadka wanaaga od halmaansantihin naftiina idinkoo akhrin Kitaabka miyeydaan wax ka sayn.

Aduunyada dusheeda wuu ku dulooba qof kitaabka Qur'anka qaatay qaar kamida qaarna ku kufriyay, dadkana wanaaga faray naftiisana ilaaway kuwaasi cadaabka lagama kala qafiifinaayo inta ay nolosha barzaqa joogan maalinta Qiyaamana waxay gali doonan cadaab kii barzaqa kasii daran.

- Ilaahey ﷻ wuxuu sheegay maalinta Qiyaame in cadaabka midka ugu daran ay gali doonan kuwa kitaabka qeeb kamid ku kufriyay qeeb kamid ahna qaatay, haddaba hadalka Alle ﷻ u fiirso wuxuu isticmaalay kalimad ah cadaab kan ugu daran, haddaba is weydii cadaabka qabrigooda siduu noqon karaa? Koley taas waa geyb Alle ﷻ ayaa la gaar ah cidna ma oga.
- Aayada kale Alle ﷻ wuxuu ku sheegay inaanan cadaabka laga kala qafiifineynin taaso laga qaadan karo sidoo kale qabriga hcadaab daran ayaa u yaalo waana goodin Alle ﷻ uu u goodinaayo gaalada iyo munaafiqiinta.
- Kuwa dadka wanaaga faro, naftoodana ilaaway ayagana waala mid kuwa aan soo sheegnay waana kuwa munaafiqiinta ah dadka isu tuso iney wanaag wadaan hasa ahaate fasahaad iyo aqli xumo arlada Alle ﷻ ku faafinaayo ayagoo muslimiin sheeganaayan.

Allow noo gargaar cadaabkada naga kori Amiin.

****

Dhamaad